# MAXAAN U DOORANNAY DARIIQA FAQRIGA?

Miyaan dunnida Hanti innagu filanni oollin

# 50ka

## Sababood ee faqriga keena

Maktabatu Al_Hilaal

# MAXAAN

## U DOORANAY DARIIQA FAQRIGA ?

Miyaan Dunnida Hanti innagu filani oolin

# 50 KA

**Sababood ee keena Faqriga**

Ismaciil Tukaale Cige

Maktabatu Al - Hilaal

# Contents

HORDHAC ........................................................ 6

FAQRIGA IYO HODANNIMMADA SIDEE BAY DIINTEENU UGA HADASHAY? .. 7

ASBAABAHA FAQRIGA ........................................................ 16

1. FAHAN LA'AANTA QAANUUNKA NOLOSHA. ........................................ 16

2. WAXAA TAHAY QOF RAADINAYA IN CID KALE SHAQO SIISO. ............. 20

3. DHINAC XUN BAAD WAX KA EEGTAA . ( NEGATIVE THINKER). .............. 22

4. ISMA XILQAANTID ( ISMA DIRTID) ........................................ 23

5. HAMMI SARE MA LIHID. ........................................ 25

6. INAAD GUULDARRAYSATO AYAAD KA BAQDAA. ........................................ 27

7. WAXAAD KA FIKIRTAA CAQABADAHA OO KALIYA, MARNA KAMA FIKIRTID MIDHAHA DANBE ........................................ 29

8. WAXAAD KU LIIDATAA BANDHIGIDA QIIMAHAAGA IYO QIIMAHA WAX SOO SAARKAAGA. ........................................ 30

9. MUSHKILADAHA AYAA KAA AWOOD BADAN. ........................................ 30

10. DIB AYAAD SHAQADA U DHIGTAA, OO WAQTIGEEDA MA DHAMMAYSID. ........................................ 32

11. WAXAAD ISKU HAYSATAA INAAD WAX WALBA TAQAANNO OO AQOON KORODHSI DIYAAR UMA TIHID. ........................................ 33

12. DAD XUN XUN AYAAD XIDHIIDH LA LEEDAHAY ........................................ 36

13. WAXAAD DHAGAYSATAA FIKRADAHA AAN XAQIIQDA KU FADHIYIN. ( You listen the Ideas not the facts). ........................................ 39

14. WAXAAD TAHAY MID CAAJIS AH OO HURDO BADAN........................ 41
15. WAXAAD TAHAY MID ISLA WAYN OO KIBIR BADAN.......................... 43
16. WAX MA DHAGAYSATID EE WAXAAD JECESHAHAY IN ADIGA UUN LAGU DHAGAYSTO. ........................................................................ 44
17. HADALKA DADKA AYAA KU SAAMEEYA................................................ 45
18. SHAQADAADA UMA HAYSID JACAYL XOOGAN IYO XAMMAASAD XOOGAN ( DHAQAAJIYE XOOGAN) (You are not motivated)........................ 48
19. GO,AAN IYO DHIIRANI UMA HAYSID SHAQADA.................................. 51
20. WAXAAD AAMINTAY FAQIIRTINIMO. .................................................. 52
21. BEENBAAD SHEEGTAA........................................................................ 53
22. WAXAAD DOONAYSAA INAAD DEGDEG QANI U NOQOTO............... 55
23. IIMAAN DARRO ( HUNGURI WAYNI) SELFISHNESS........................... 58
24. WAX KAMA BARATID KHALADAADKAAGII HORE ............................. 59
25. BALWAD BAAD LEEDAHAY. ................................................................ 60
26. WAXAAD TAHAY MID WAQTIGIISA KU LUMIYA WAXAAN FAAIIDO LAHAYN. ........................................................................................... 61
27. DADKA HORUMARKA SAMEEYAY AYAAD XAASIDDAA. .................... 62
28. WAXAAD TAHAY MID WARWAR IYO WALAAC BADAN...................... 63
29. DAD XUN BAAD SHAQAALE KA DHIGATAA. ...................................... 64
30. NAFTAADA KUMA KALSOONID ............................................................ 65
31. WAXAAD LA NOOSHAHAY WIXII TAGAY . ........................................... 66
32. WAXAAD KU NOOSHAHAY YIDIDDIILO AAN CAMAL WADAN............. 67
33. MAS'UULIYADDA MUSTAQBALKAAGA MA QAADID ......................... 68

a. EE CID KALE AYAAD KA SUGTAA ..... 68
34. YOOL CAD MA LIHID ..... 74
35. BALLANTA MA OOFISID ( waad ballan daran tahay) ..... 77
36. AMMAANO IYO XIRFAD MIDNA MA LIHID ..... 78
37. INAAD QANI NOQOTO KUMAAD TALA GALIN. ..... 88
38. SI FIICAN UMA MAAMMUSHID LACAGTAADA. ..... 89
39. WAXAAD AAMINSANTAHAY INAAD XOOG U SHAQAYSO SIDAANA XOOLO KU HESHO. ..... 91
40. ISBADALKA WAAD NECEB TAHAY ..... 92
41. WAAD AKHLAAQ XUN TAHAY ..... 95
42. SHAQADA MA JOOGTAYSID ..... 96
43. MA TAQAANID SIDA AY ARIMUHU U KALA MUDAN YIHIIN. ..... 98
44. WAXAAD WAQTI BADAN KU LUMISAA KA HADALKA DADKA KALE CEEBAHOODA ( WAAD XAN BADAN TAHAY) ..... 100
45. MARKA ALLE WAX KU SIIYO AYAAD IS CAJABISAA ..... 102
46. MACAASIDA ( DANBIYADA) AYAAD SAMAYSAA. ..... 103
47. XOOLAHAAGA SADAQADA IYO SAKADA KAMA BIXISID ..... 106
48. SHARIIGAAGA AYAAD KHIYAAMAYSAA. ..... 106
49. NIMCADA ILAAHAY KU SIIYAY KUMA SHUKRIDID. ..... 107
50. WAAD IS DHIIBTAA ..... 107

# HORDHAC

Marka hore waxaan ku bilaabayaa bisinka Alle, waxaa mahadle Rabiga ina abuuray ee buuraha iyo cirka taagay.

Nabi Maxamedna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee.

Buuggan la magac baxay MAXAAN U DOORANNAY DARIIQA FAQRIGA, MIYAAN DUNIDA HANTI INNAGU FILANI OOLLIN? Oo ah buug lagu qoray afka hooyo waxa aan rajaynayaa inuu wax badan ka tari doono horumarinta dadka afka soomaaliga ku hadla, iyo sidii ay uga bixi lahaayeen faqriga. Kitaabkan waxaan ku soo ururinnay konton sababood oo faqriga keena.

Arrimaha ku qorannina waa arrimo dhammaantood qof kasta oo akhristaa uu dareemi karo kana marag kici karo inay yihiin wax jira oo dhab ah.

Akhristaha waxaan kula talinnaynaa inuu naftiisa ku qiimeeyo oo qodob kasta uu dul istaago oo uu is waydiiyo bal halka uu ka taagan yahay, kadibna uu nafttiisa darajo siiyo. Marka uu dhameeyo akhriskana uu darajooyinka isku geeyo si uu u ogaado heerka uu taagan yahay, qodobbada markaa uu ku liitana uu ka hawlgalaa sidii uu iskaga sixi lahaa.

Haddii darajadaadu ka hooseeyso boqolkiiba konton, waxaad ku sugan tahay xaalad halisa oo u baahan in aad sida ugu dhakhsaha badan leh go'aan dagdagga uga qaadato sidii aad naftaada is baddal ugu samayn lahayd. Haddiise aad keento darajada 50% iyadana waad hoosaysaa, waxaanad kamid tahay bulshada dhexe oo quutal daruuriggaaga waad

iska heshaa, horumar badanna ma lihid, markaa is daba qabo oo wixii kaa dhiman ku dar, oo qodobadda aad ku dhacday iska sax. Kolba darajada aad keentaa waxay ka turjumaysaa heerka horumarkaaga dhaqaale taagan yahay.

Waxaan ILAAHAY ka baryayaa in uu buuggan bulshada ku anfaco, Anigana camalkayga ka dhigo mid isaga u khaalis ah, miisaankayga xasanaadkana uu iigu daro maalinta la qatan yahay ee la qaawan yahay.

Wabilaahi tawfiiq.
Qoraa Ismaaciil Tukaale cige.

## FAQRIGA IYO HODANNIMMADA SIDEE BAY DIINTEENU UGA HADASHAY?.

Hodannimmada iyo faqriga labaduba marka hore waa imtixaan, qofka qaniga ahna waxaa la eegayaa bal waxa uu ku sameeyo xoolaha Alle siiyay, kan faqiirka ahna waxaa la eegayaa inuu ku samro iyo in kale.

Waxaa kale oo in la tilmaamo mudan in kala qaybsanaanta dadku ay u kala qaybsan yihiin qani iyo faqiir ay xikmadi ku jirto oo haddii dadku qani wada ahaan lahaayeen noloshu macno ma yeelateen, sidoo kale haddii ay faqiir wada ahaan lahaayeena macno ma yeelateen. Iyadoo ay sidaa tahay ayaa haddana in la xuso mudan in qof walba uu xorriyad buuxda u haysto inuu faqiir noqdo iyo inuu Qani noqdo, maxaa yeelay dariiqa faqriguna waa mid cad oo sababihiisa wata, dariiqa Qaninimaduna waa mid muuqda oo sababihiisa wata

Ninka dunida ugu qanisan ee la yidhaahdo BIL GATE ayaa wuxuu yidhi: haddii aad dhalato adiga oo faqiir ah wax danbi ah kuma lihid, haddiise aad dhimato adiga oo faqiira taas danbi baad ku leedahay.

Nin gaala hadalkiisa inaan daliil ka dhigano waa laga fiican yahay, laakiin gaalku wixii xikmada ee diinteenana aan ka hor imannayn waa laga qaadan karaa. Tani waxay la mid tahay qofku wuu dhalan karaa isaga oo aan wax ajar iyo khayr midna wadan, haddiise uu dhinto isaga oo sidii uu ku dhashay ah oo aan waxba khayr shaqaysan taas danbi buu ku leeyahay, tan iyo taasi waa isku mid waxba kuma kala duwana.

Waa fikir qaldan inaan qaddarka Alle u daliishano faqrinnimadeena oo aan nidhaahno: ILAAHAY baa noo qoray, sidaa waxaan odhan karnaa marka aynu sababta oo dhan la nimaadno ee haddana aan waxba ku heli wayno, laakiinse inagga oo iska fadhina oo aan far dhaqaajinayn inaan qaddarka ILAAHAY xujo ka dhigano taasi maaha mid diinteena daliil ka haysata.

Inta badan waxaa dhacda in haddii qofku sababta la yimaado Allena talada saarto aanu hoojinnayn ajarkiisana aanu dayacayn, sida ilaahay quraankiisa ku sheegay.

فَإِنَّ اللهَ لَا يُضِيعُ أَجْرَ الْمُحْسِنِينَ

( *ilaahay dadka muxsiniinta Ajarkooda ma lumiyo*).

Marka aan eegno dunida aan ku noollahay, waxay u kala qaybsan tahay duni xaga dhaqaalaha ka horumartay iyo duni xaga dhaqaalaha dib u dhacday, waxaana taas sabab u ah; waa dadka ku kala nool oo ku kala

duwan qabsashada asbaabaha faqriga iyo kuwa Qaninimada ee kitaabkeenu ka hadlayo.

Waxaa kale oo in la tilmaamo ah in Qaninnimada ay diinteenu dhiirigalisay halka faqrigana ay ka digtay. Nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu Alle ka magan galay faqriga, wuxuu yidhi:

اللهُمَّ إنِّي أعُوذُ بِكَ مِنَ الْكُفْرِ وَالْفَقْرِ

***(Rabigayoow waxaan kaa magan galay Gaalnimo iyo faqri).***

Faqrigu wuxuu bulshada ku keenaa mashaakilo badan; tuugada waxaa keena waa faqriga, gabadha oo jidhkeeda ka ganacsata waxaa keenaa waa faqriga, baryada iyo tuugsiga waxaa keena waa faqriga, budhcadnimada waxaa keenaa waa faqriga.

Waxaa taa lidkeeda ah Qaninnimada oo marka meesheeda la dhigo ee xoolaha loo maamulo sida Alle doonayo waxaa ka dhasha khayr fara badan oo bulshada saamayn wanaagsan ku yeesha.

Qaninnimada noocaas ah nabiga ayaa tilmaamay oo yidhi:

لا حَسَدَ إلا فِي اثْنَتَيْنِ : رَجُلٌ آتَاهُ اللهُ الْكِتَابَ فَهُوَ يَقُومُ بِهِ آنَاءَ اللَّيْلِ وَآنَاءَ النَّهَارِ ، وَرَجُلٌ آتَاهُ اللهُ مَالا فَهُوَ يَتَصَدَّقُ بِهِ آنَاءَ اللَّيْلِ وَآنَاءَ النَّهَارِ

(( *wax la isku xaasiddaa ma jiro oo aan ka ahayn laba shay; nin ILAAHAY siiyay kitaab ( cillmi) oo habeen iyo maalinba akhrinaya, iyo nin Ilaaahay siiyay xoolo oo habeen iyo maalinba sadaqadaysanaya).*

ILAAHAYNA quraankiisa wuxuu ku sheegay in xoolaha oo lagu bixiyo jidka ilaahay ay xataa nafta ka horeyso.

(وجاهدوا بأموالكم وأنفسكم في سبيل الله ذلكم خير لكم إن كنتم تعلمون )

( *Ku jihaatama maalkiina iyo naftiina.*)

Xadiis kale oo tilmaamaya fadliga ay xooluhu leeyihiin;

عن أبي ذر الغفاري رضي الله عنه أن ناسا من أصحاب رسول الله ﷺ قالوا له : يا رسول الله ، ذهب أهل الدثور بالأجور ، يصلون كما نصلي ، ويصومون كما نصوم ، ويتصدقون بفضول أموالهم،

قال : أوليس قد جعل الله لكم ما تصدّقون ؟ إن لكم بكل تسبيحة صدقة ، وكل تكبيرة صدقة ، وكل تحميدة صدقة ، وكل تهليلة صدقة ، وأمر بالمعروف صدقة ، ونهي عن منكر صدقة ، وفي بضع أحدكم صدقة

قالوا : يا رسول الله ، أيأتي أحدنا شهوته ويكون له فيها أجر ؟ ، قال (أرأيتم لو وضعها في حرام ، أكان عليه وزر ؟ فكذلك إذا وضعها في حلال كان له أجر ) رواه مسلم .

*Saxaabada kuwii faqiirka ahaa ayaa rasuulka u yimid oo ku yidhi: Rasuulkii Ilaahayoow dadka xoola lihi ajarkii oo dhan iyaga ayaa qaatay, maxaa yeelay way tukanayaan sida aan u tukano, wayna soomayaan sida aan u soonno, waxaa kale oo ay sadaqaysanayaan wixii maalkooda dheeraad ka ah.*

*Rasuulku markaa wuxuu ku yidhi: oo idinku miyay daan haysan wax aad sadaqadaysataan?Tasbiix kastaaba waa sadaqo, Allaahu akbar kataaba waa sadaqo, alxamdulilaah kastaa waa sadaqo, Laa Ilaaha ilallaahu kastaaba waa sadaqo, wanaaga oo aad amartaan waa sadaqo, xumaanta oo aad nahisaan waa sadaqo, midkiin oo xaakiisa u tagaa waa sadaqo).*

Maalintii danbe ayay ku soo noqdeen oo ay yidhaahdeen rasuulkii ILAAHAYOOW kuwii xoolaha lahaa intii aad noo sheegtayna way nala sameeyeen? Rasuulka Alle naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu ku jawaabay kaasi waa fadliga Alle oo ciddii uu doonno ayuu siiyaa.

Sidaa daraadeed xooluhu waa fadli ILAAHAY bixiyo oo haddii sidii Rabi kaa doonayay aad u maamusho aad jannada Rabi ku galayso, markaa waa liibaan aduunyo iyo mid aakhiraba.

Haddii aan qaninimo jiri lahayn dunidu ma qurux badnaateen, guryo lama dhisteen, iskuulo ma jireen, masaajido lama dhiseen, jidad qurux badan may jireen, dunidu waxay ahaan lahayd mugdi madaw.

## HANTI INTEE LE, EG BAA DUNIDA TAALA.

Hantida dunida taalaa maaha mid la qiyaasi karo, Alle subxaanahuu watacaalaa khasnadihiisu way buuxaan, cid dhamayn kartaana ma jirto Sida xadiis alqudsi uu ku sheegay.

عَنْ أَبِي ذَرّ رضي الله عنه عَنِ النَّبِيِّ صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ ، فِيمَا رَوَى عَنِ اللهِ تَبَارَكَ وَتَعَالَى أَنَّهُ قَالَ :
يَا عِبَادِي لَوْ أَنَّ أَوَّلَكُمْ وَآخِرَكُمْ وَإِنْسَكُمْ وَجِنَّكُمْ قَامُوا فِي صَعِيدٍ وَاحِدٍ فَسَأَلُونِي فَأَعْطَيْتُ كُلَّ إِنْسَانٍ مَسْأَلَتَهُ ، مَا نَقَصَ ذَلِكَ مِمَّا عِنْدِي إِلَّا كَمَا يَنْقُصُ الْمِخْيَطُ إِذَا أُدْخِلَ الْبَحْرَ

Haddii ibnu aadamka dhamaantii iyo jin dhamaantii kii ugu horeeyay ilaa kii ugu danbeeyay ay istaagaan goob kaliya oo mid kataaba ILAAHAY waydiisto waxa uu doonayo, oo aan siiyo waxba ka nuqsaamin maayaan

mulkiyaga illaa sida dun bad la galiyay oo kale mooyee. ( dun bad lagaliyay maxay ka nuqsaamin kartaa?.

ILAAHAY hantida uu dunida dhigayna waa mid aan qiyaas lahayn, laakiin sidii loola soo bixi lahaa ayaa xikmad iyo xarfad u baahan, oo ILAAHY ciddii xarfadeeda la timaada ayuu u furaa, ciddii kale ee dariiqeeda mari waydana bilaa sabab ma siiyo.

Waana sunne kawni ah, waa qaanuun la yidhaahdo sabab iyo natiijo.

Qaanuunkaasi ma yaqaano kanaa gaala kanaa muslima, kanaa cad kanaa madaw, kanaa gaaban kanaa dheer, kanaa nin ah tanaa naaga, ciddii dariiqaa marta wuu siiyaa ciddii mari waydana ma siiyo.

Waxaa wax lala yaabo ah in hantida dunida taala 80% kamida ay haystaan boqolkiiba labaatan dadka kamida.

Tusaale kaliya haddii aan kuu soo qaato; hantida uu haysto ninka dunida ugu qanisan ee la yidhaahdo Bill Gate waxay January 2015kii gaadhaysay 81 billion oo dollar, kasoo qaad in Bil gate uu hantidaa bankiga ku kaydiyo oo dul saarka uu ka qaataa ay tahay 3% ( shareecada islaamku dulsaar waa ribo waana xaaraan), dulsaarka maalintii kaliya uu helayaa waa 6.6 million dollar saacad kasta wuxuu helayaa 277,400usd.

Ninkaa kaliya bal u fiirso imisa dawladood oo Africaana ayuu ka miisaaniyad badan yahay?

**WAXA DIBADDA KA MUUQDAA WAA SAWIRKA WAXA GUDAHA KU JIRA.**

Waxaan ku noolahay duni ay wax walba lammaane yihiin; habeen iyo maalin, cir iyo dhul, nin iyo naag, madaw iyo caddaan, qani iyo faqiir , iwm.

Fikirkaagga, iyo dhaqankaagu waxay saamayn laxaad leh ku yeeshaan kolba meesha aad dunida kaga jirto iyo heerka noloshaadu halka uu gaadhsiisan yahay.

Marka aan hoos u soo daaddagno ee aan ka hadllayno Qaninnimada iyo faqriguna waxay soo hoos galayaan uun qaannuunkaa, oo ah rumayntaada, iyo fikirkaagga ayaa aas aas u ah kolba heerka dhaqaale ee aad samaynayso,

Haddii aan tusaale cad kaa siiyo arrintaa; waxaad markhaati ka tahay in dadka Lotteriga ( bakhtiyaanasiibka) ku guulaystaa ay lacag aad u badan ku helaan si kadis ah oo lama filaana, muddo yar kadibna lacagtaasi ay baaba'do oo la garan waayo meel ay martay.

Waxaa kale oo aan markhaati ka nahay in dadka dhaxalka wax ku helaa ee aan hantida u soo dhiddidin ee dariiqii lagu helayayna aan garannayn in ay iyaguna si degdega lacagtaas u lumiyaan.

Waxaa kale oo aan ognahay in dadka Millineerka ( hantiilayaasha ah) haddii ay khasaaraan lacagtooda oo dhan in mudo yar gudahood ay lacagtii ay khasaareen iyo mid ka badanba ku helaan. Haddaba maxay tahay sirta ka danbaysa labadan arrimood?.

Sirta ka danbaysaa waxa ay tahay waxay ku kala duwan yihiin waa waxa gudaha maskaxdooda ku jira; ka bakhtiyaanasiibka ku helay iyo ka

dhaxalka ku helayba malaha awood maskaxeed ku filan oo ay ku hanan karaan hantida intaa le'eg ee uu maddada yar ay ku heleen. Markaanse ka hadlayno hantiile khasaaray, waxaan arkaynaa in waqti yar kadib uu hantidii uu khasaaray iyo mid kabadanba ku helayo, maxaa yeelay wuxuu leeyahay awood maskaxxeed leh khibrad iyo aqoontii uu lacagtaa markii horeba ku sameeyay.

Mid kamida Millioneerada dunida ( hantiileyaasha dunidda) ayaa waxaa laga soo xigtay inuu yidhi: Hantidayda oo dhan qaata, shandad madhana ii dhiiba , meesha aad dunida doontaana I geeya, waxaan hubaa inaan muddo yar ku samayn karo lacagtii hore mid lamida ama mid ka badanba.

Wali ma aragtay laba geed oo midna midho badan oo qurux badan oo macaani ku yaalaan,ka kalena uu yahay geed aan midho fiican bixin, caleemihiisuna ay qalalan yihiin?. Haddii aad aragtay maxay tahay sirta ka danbaysa inay labada geed sidaa u kala duwanaadaan?. Sirta ka danbaysaa waxay tahay labada geed waxay ku kala duwan yihiin xiddidaddooda iyo sida ay u helaan biyo iyo nafaqo ku filan.

Inagu bini, aadan markaan nahay had iyo jeer waxaan aragnaa natiijada, laakiin isma waydiino inta badan natiijada wixii keenay. Qof horumar sameeyay, dawlad horumar samaysay, qof guuldaraysatay dawlad guuldaraysatay, waxaa aas aas u ah oo saldhig u ah waa kolba fikirka gudaha ku jira iyo aaminaadiisu nooca uu yahay. Kolba fikirka guduhu sida uu yahay ayuun baa dibaduna u ekaadaa. Natiijada aan ku arkayno waaqica waa sawirka wixii gudaha ku jiray oo dibada u soo baxay.

Markaa in gudaha la hagaajiyo oo khaladka laga saxo oo haddii maskaxda marka hore borograamka ku jiray uu ahaa mid khaldan la foormaatgareeyo oo lagu baddalo borograam fiican miyaanay kula ahayn?

Arrintani ahmiyadda ay leedahay awgeed marka aan u soo noqono diinteena suuban waxay marka hore awoodda saartay dhisida iimaanka, maxaa yeelay marka iimaanku saxmo ayaa camal fiican oo toosan la heli karaa, laakiin marka iimaanku khaldan yahay camalkuna wuu khaldamayaa.

Sidaa dareed ayaa Nabi Maxamed naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee, wuxuu saddex iyo toban sano oo dhan ku yeedhayay caqiiqdada ( iimaanka).

Markii iimaankii uu saxmay ayaa camalkii la waajibiyay sida salaadii, sakadii, soonkii, jihaadkii, iwm.

Haddaba si uu ficilka inaga soo fulayaa u noqdo mid midho fiican dhala, waa inaan ku dadaalaa inaan toosino fikirka maskaxda ka soo fulaya, oo aan maskaxdeena ka saarno fikradaha qaldan ee keenaya inay ficilo qaldan oo natiijooyin qaldan keenaya ay xubnaheena kasoo fulaan.

Sidaa awgeed haddii aan doonnayno inaan horumar dhaqaale samayno, waxaa inala gudboon in marka hore dhisno maskaxda dhalinyarteena, taas ayaa ka horraysa in la dhiso guryo iyo dariiqyo iyo warshado. Haddii Bini,aadamka caqligiisa la dhiso wax kasta oo kale way hagaagayaan,

hadiise bini'aadanka fikirkiisu qaldamo wax kasta oo kale way xumaannayaan.

# ASBAABAHA FAQRIGA .

## 1. FAHAN LA'AANTA QAANUUNKA NOLOSHA.

Waa Qaanuunka la yidhaahdo (Sabab iyo Natiijo).

Qaanuunkan macnahiisu waa marka sabab la helo ayaa natiijo lahaa, sabab la'aanse waxba kuma yimaadaan.

ILAAHAYNA quraankiisa wuu ku caddeeyay arrintaa wuxuuna yidhi

وجعلنا كل شي سببا

*( shay kastaba dhiciddiisa sabab baan u yeellay.)*

Dadku waxay khalad ka aaminsayihiin Qaddarka. Marka uu wax dhaco iyaga oo aan eegayn sababta keentay ayay Qaddarka ILAAHAY ku sababeeyaan. Rumaynta Qadarku waa mid kamida lixda iimaanka, waana waajib. Ninka qadarka ALLE beeniyaana waa gaal, laakiin waxaa muhiima in qaddarka ILAAHAY loo rumeeyo si sax ah.

Tusaale ahaan ruux baa si ula kac ah ( kas ah) gaadhi ordaya hortiisa iskugu tuuray, gaadhigiina sidaa ku jiidhay, mid kale ayaa shaqadiisii soo xaadiri waayay oo iska seexday, kadibna shaqadii taas awgeed looga eryay lwm, bal ka warran haddii dadkaasi ay yidhaahdaan ILAAHAY baa noo qaddaray, maka aqbali lahayd?.

Ilaahay Maryan binu Cimraan iyada oo foolanaysa ayaa la amray inay jiridda geedka timirta ah ruxdo si midhuhu ugu soo daataan isaga oo ilaahay awooda inuu sabab la,aan u soo daadiyo

Sidoo kale Haajira oo ahayd Nabi Ismaaciil hooyadii markii Nabi Ibraahim cidlada kaga tagay ee iyada iyo ilmihii haraad xun ku habsaday waxay oroday todoba jeer inta u dhaxaysa Safa iyo Marwa

Kadib ayay biyihii idanka ILAAHAY ugu soo burqadeen, ILAAHAY sabab la,aan wuu karayay inuu biyaha u soo burqiyo, laakiin waxaa ilaahay doonay inay horta iyadu awoodeeda isticmaasho oo sabab la timaado.

Qiso kale oo caddaynnaysa in fahankaasi qalddan yahay ila akhri:

Laba dhallin yara ayaa doodi dhex martay; midkood wuxuu ku dooddayaa in haddii uu shaqeeyo iyo haddii kaleba wixii ILAAHAY u qoray uu helayo, ka kalena wuxuu ku doodday in haddii uu sabab la iman waayo aanu waxba helayn. Kii ku dooddayay in wixii ILAAHAY u qoray sabab la'aan uu mar kastaba helayo ayaa dooddii ku adkaadday, waayo wuxuu ku xujeeyay saaxiibkii Qaddarka Alle, kaas oo diiddistiisu ay gaalnimo keenayso. Wiilkii kale ayaa isaga oo ay ka dhaadhici la'dahay arrintaasi, laakiinse ka baqaya in haddii uu sidaa rumayn waayo uu ku gaaloobayo ayaa go'aan ku qaatay in bal arrintaa uu tijaabiyo inay suuragal tahay iyo in kale.

Masaajid ayuu tagay salaaddii ayuu jamaca la tukadday, markii laga baxay salaaddii duhur ee dadkii nin walba reerkiisii u qado doontay, isagu masaajidka ayuu iskaga hadhay oo wuxuu galay qol yar oo

masaajidka qolalkiisa kamida, isaga oo ku sugaya in arsaaqddii Alle u qoray samada uga soo dhacdo.

Waxaa jiray nin maalqabeen ahaa oo masaajidka la jaar ahaa, waxaa kale oo jiray xer masaakiin ah oo masaajidka wax ku barata, kuwaas ayuu ninkaas maalqabeenka ahi maalin walba qado u keenaa, siddii caadadu ahayd qadaddii buu u keenay, laakiin saaxiibkeen qolkii buu iskaga jiraa oo ma soo bixin. xertii qadadii way iska cuneen. Maalintii oo dhan wiilkii sidii ayuu u qatanaa oo baad iyo biyo midna kama daggin. Maalintii labaad markii salaaddii duhur laga baxay ee nin walba xaafaddiisii u qadado tagay, kaligii buu masaajidkii ku soo hadhay.

Ninkii taajirka ahaa ayaa siddii ay caadadu ahayd cuntaddii keenay, laakiin odaygii masaajidka mas'uulka ka ahaa ayaa yidhi: cuntada maanta iska celi waayo xertii masaajidka joogi jirtay maanta meel kale ayaa laga macsuumaye. Wiillkii yaraa oo qolkii yaraa ku jira wuu maqlayaa hadalka, labo maalmoodna wuu qatan yahay, arrintuna meel adag bay ka marraysaa, gaajo awgeed ayaa bogga iyo beerku isku dhegeen, markuu arkay in meesha cunto la sido oo haddana la celinnayo, ayuu is haysan kari waayay markaasuu yidhi: ux ux, ux, si loo maqlo. Odaygiibaa meeshii shanqadhu ka baxaysay soo fiiriyay mise waxaa ku jira nin, markaasuu ninkii taajirka ahaa la hadlay oo yidhi waar cuntada soo celi, mid xertii kamid ah ayaa meesha ux ux ka yidhiye.

Wiilkii yaraa cuntaddii baa loo soo dhigay, markaasuu illayn waa nin laba maalmood qatanaaye si waali ah cuntadii u dalddalay isaga oo leh: waxay yidhaahdeen saba la'aan ayaa wax lagu helaa, waxay yidhaahdeen

sabab la'aan ayaa wax lagu helaa, wallaahi sabab ayaa arsaaqda lagu helaa haba yaraato oo ha ahaato : ux uxe uxe,

Wuxuu u jeedaa Ux Uxdii aan idhi ayaa sabab u noqotay inaan cunto helo, laakiin haddii aan iska aamusi lahaa waxba ma heleen.

Qisadan waxaan ka qaadanaynaa in haddii aad doonayso inaad wax hesho aad sabab latimaadid.

Haddii aanad wax beerin waxba goosan maysid, waliba kolba waxa aad beerto nooca uu yahay uun bay natiijadu noqonaysaa, haddii aad basbaas beerto basbaas baad goosan, haddii aad baradho beerto baradhaad goosan, haddii aad gallay beertana gallay baad goosan, waayo qaanuunka nolosha ayaa sidaa u dhigan.

Arrin kale oo qaldan baa jirta oo dadka caamada ahi aamin san yihiin, oo ah in nasiib wax lagu helo. Waa run nasiib waa jiraa, laakiin nasiib ciddii dariiqeeda marta ayuu la kulmaa, kasoo qaad in nasiibku albaabkaagga garaaco, laakiinse aad ka furi waydo,kadibna uu ku dhaafo oo albaabka jaarkaaga garaaco, jiiraankaaguse uu ka furo, kadibna aad tidhaahdo Alla anigu waan nasiib darannahay, jiiraankayguse wuu nasiib badan yahay.

DIKTOOR IBRAAHIN ALFIQI ayaa wuxuu yidhi: (*dadka guusha gaadhay waa run oo way nasiib badan yihiin, laakiin nasiibku waa mid ay gacantooda ku samaysteen).*

Haddii markaa adigu aad tahay mid aan fahansannayn qaanuunkan nolosha Alle u dajiyay ee sabab iyo natiijo oo aad

adiga oo fadhiya leedahay Allaa ii qaddaray amase nasiib kayga ayaa xun ogow inaad fikir qaldan aaminsan tahay, taas waxaa lamida adiga oo salaadda, soonka, sakada, xajka iwm iska daaya, haddana yidhaahda; ILAAHAY hadduu janno ii qorayna waan gali haddii uu naar ii qorayna camalku waxba ii tarimaayo.

Ma ila aragtay akhristoow in fikirkaasi qaldan yahay, haddaba adigu haddii aad hore uga mid ahayd dadka iyaga oo aan wax shaqo ah la iman xujo ka dhigta qaddarka ogow inaad adigu xoriyadaada ku dooratay dariiqa faqriga.

## 2. WAXAA TAHAY QOF RAADINAYA IN CID KALE SHAQO SIISO.

Waa sida aan ku soo barbaarnnay ee bulshadeenna aan ka dhaxallay. Markaa adigguna haddii aad tahay mid ay maskaxdiisa ku borograamgaraysan tahay in cid kale shaqo siiso, sidaasina ay tahay sida kaliya ee aad wax ku heli karto, dhibaatadana kaga bixi karto, kani waa fikir ku dhaxalsiinaya in aanad waliggaa horumar dhaqaale samayn ee aad mar walba cid kale addoon u ahaato.

Dunida dhaqaaalaheeda horumaray, waxaa hormuud u ah rag leh hal abuurnimo iyo abuuris shaqo madax bannaan.

Waxaa tusaale la taaban kara ah sida maraykanka iyo Jabaan

Haddii aanay jiri lahayn ragga ay tusaalaha u yihiin, Ford, Bill gates, Toyota, Mitsubishi, Getty, iwm, horumarkaasi iyo qaninimadaasi ma jirteen.

Maanta haddii waaqaceena waxa ka jira aan yara falanqayno waxaan arkaynaa in dhalinyaradda tirada badan ee jaamacadaha

ka soo baxaysaa maskaxdooda ay ku duuban tahay cajalad ah in cid kale shaqo gayso, haddii markaa uu waayo cid shaqo siisana sidaa ku niyad jabo oo uu sidaa isku dhiibo, laakiinse haddii uu fikiri lahaa oo maskaxda ka shaqaysiin lahaa isaga oo kalsooni isku qaba oo uu daraaso samayn lahaa, waxaa laga yaabaa in shaqo fiican oo ugaba lacag badan tan uu raadinnayo uu samaysan lahaa, laakiinse qorshahaba uguma jirto inuu isagu shaqo samayn karo.

Waxaan shaki ku jirin dadka iyagu shaqada samaystaa inay ka horumar baddan yihiin kuwa iyagu shaqaalaha noqda.

Waxaan jecelahay inaan halkan ka tilmaamo in marka aad doonayso inaad wax abuurto loo baahan yahay inaad meel hoose ka bilawdo, arrintaasina waxaa ku dhiirrada dadka aan wax baran ee aan heer jaamacadeed gaadhin, taasina waa ta u suuragalisa inay horumar ka gaadhaan ganacsigga, laakiin mushkiladda haysata dhalin yarada jaamacadaha ka baxda waxay doonayaan in meel sare ay ka bilaabaan,taasina waa ta keentay in dadka jaamacadaha ka baxa ee baayacmushtarka noqdaa ay aad u tiro yar yihiin, halka dadka hantida leh intooda badan ay yihiin dad aan aqoon badan lahayn.

Arrimaha faqriga inooggu wacan ayay tannina kamid tahay,taas oo ah in aan doonnayno in cid kale marwalba shaqo inna siino, oo aan meesha ka saarno inaan innagu isku tashano oo aan wax qabsano innaga oo isticmaalayna maskaxdeena iyo fikradaha hodanka ah ee ILAAHAY inaggu manaystay.

Si aad uga faaiidaysato ku dhaqan qodobadan

## 3. DHINAC XUN BAAD WAX KA EEGTAA . ( NEGATIVE THINKER).

Ma jiro shay khatar ku ah ama cadaw ku ah fikirka fiican oo aan ka ahayn saaddaallinta xun iyo in aad dhinaca xun wax ka eegtid.

Marka aad dhinaca xun wax ka eegaysid waxa aad aaminsan tahay in fikir kasta oo maskaxddaada ku soo dhaca fulintiisu ama hirgalintiisu ay adagtahay, iska daa inaad fulisee waxaad aaminsan tahay xataa in la isku dayaa inaanay suuragal ahayn, maxaaa yeelay waxaaad aaminsantahay in fikirkaasi aanu shaqaynayn.

Aamminaada noocan ahi waa sun dillaysa fikradaha waxtarka leh ee horumarkaaga iyo dhismaha mustaqbalkaaga ka qayb qaadan lahaa.

Adigu marka aad fikradahaaggii wanaagsanaa suntaa khatarta leh ku dishay ayaad aragtaa qayrkaa oo wax qabsaday markaasaad bilawdaa inaad iyaga xaasiddo oo aad wax ka sheegto.

Waxaad tahay mid had iyo jeer koobka biyaha ka fiiriya dhinaca madhan, ma tihid mid ka fiiriya dhinaca buuxa

Nabiguna naxariis iyo nabad gelyo korkiisa ha ahaatee sida uu ku wariyay xadiis alqudsi wuxuu Alle yidhi

**قال : قال النبي - ﷺ - : يقول الله تعالى**
**أنا عند ظن عبدي بي**

**( *anigu waxaan ahay adoonkayggu sida uu iga malaysto*).**

Taas macnaheedu waxay tahay ILAAHAY haddii aad ka malaysato khayr, khayr baad heli, haddii aad xumaan ka malaysatana xumaan baad heli.

Haddii adigu markaa aad tahay mid mar walba dhinaca xun wax ka eegaya, marnaba suuragal kuuma ah inaad talaabo fiican hore u qaadid oo aad wax qabsatid.

Markaa miyaanad adigu dariiqa faqriga xoriyadaada ku dooran, waayo fikrad kasta oo noloshaada baddali lahayd waxaad u aragtaa inaanay soconayn, dee markaa jugjug meeshaada joog oo yaanay waxba kuu kordhin sow arrinku maaha?!!!.

## 4. ISMA XILQAANTID ( ISMA DIRTID)

Waxaad mar walba sugtaa in wax laguu sheego, in wax laguu diro, ma tihid mid is dira oo hawsha u dhaqaaqa oo baylahda taagan gacantiisa wax kaga qabta. Mar kasta waxaad tidhaahdaa: waxaa fiicnaan lahayd in arrintaa wax laga qabto,waxaa fiicnaan lahayd in mushkiladaa loo helo cid xalisa, waxaa fiicnaan lahayd in sidaa iyo sidaa la yeelo.

Haddii dadka dunida jooga oo dhani noocan u fikiri lahaayeen, duniddu ma gaadheen horumarka ay maanta gaadhay, telefoonka lama soo saareen, Tv ma jireen, diyaaradi ma jirteen, gaadhi ma jireen, laydh ma jireen, laakiinse waxaa la helay dad iyagu is xilqaama oo iyaga oo aan cidina dirin, cidina ku khasbin inay wax qabtaan iyagu is diray oo dareemay waajibaadka saaran

iyo inay dusha u riteen mas'uuliyadda waxqabadka wixii awoodooda ah.

Waxaa jiray Nin boqor ah oo doonayay inuu kala ogaado inay dadkiisu yihiin qaar is xilqaama iyo in kale, dariiqa dadka iyo gawaadhidu maraysay ayuu wuxuu dhiggay dhagax wayn, kadibna meel dariiqa u dhaw buu ku dhuuntay.

Dadkii marka ay dariiqa soo maraan ee ay arkaan in dhagax wayni yaalo ayay iyaga oo caytamaya oo leh: boqorkan xun ee dulligga ah, bal dariiqyadii baa go,an, isaguna kursiga uun buu iska fadhiyaa, inuu wax qabto ma doonayo, kadibna dib ayay iskaga noqdaan. Markii danbe nin baa meesha soo maray, markii uu arkay in dariiqii go'an yahay ayuu istaagay, dad kale ayuu u yeedhay oo uu ka codsaday in dhagaxa meesha ay kala qaadaan, shaqo adag ka dib, ninkii iyo dadkiisii waxay ku guulaysteen inay dhagaxii meesha ka qaadaan. Meel aan sidaa dariiqa uga fogayn ayuu boqorkii ka soo baxay, markaasuu ninkii wuxuu u dhiibay jeeg ay ku qoran tahay hal malyuun oo dollar, wuxuuna ku yidhi: hadiyaddaa adiga ayaa iska leh, aniga ayaa dhagaxa dariiqa dhigay, waxaanan eegayay ninka dadkayga kamid ah ee isxilqaama ee dhagaxa meesha ka qaada.

Haddii aad isxilqaanto hadiyadda camalkaagga waad heli dag dag u hel amase gadaal ka heloo. Haddiise aad tahay mid had iyo jeer cid kale ka sugaya inay wax kuu sheegto ogow inaad adigu dooratay dariiqii faqriga.

## 5. HAMMI SARE MA LIHID.

Nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee isaga oo innagu dhiirigalinnaya inaan hammigeena kor u qaadno ayuu wuxuu yidhi:

إذا سألتم الله فاسألوه الفردوس الأعلى من الجنه

*(Haddii aad Alle wax wayddiisannaysaan wayddiista fardawsa, maxaa yeelay waa Janooyinka ta ugu saraysa).*

Haddii la inna amray inaan xataa jannada ka damacno ta ugu sarreysa, waxaa fiican in aan shay walba kiisa ugu sarreeya ka damacno.

Hiigsig3aagu haddii uu hooseeyo, qorshahaaguna wuu hooseeyaa, wax qabadkaaguna wuu hooseeyaa. Fikrad fiican uma dhaqaaqdid fulinteeda, maxaa yeelay taasi hammi wayn ayay u baahan tahay, taasina adiga kuguma jirto. Waxaad raali ku tahay xaaladda aad ku jirto, waxaad raali ku tahay waxa yar ee aad haysato, waxaad raali ku tahay aqoonta yar ee aad leedahay, waxaad ku qanacsantahay inaad u noolaato sida dadka jaarkaaga ah ay u noolyihiin, maxaa yeelay dadkaasi maaha qaar horumar gaadhay. Waxaad ku qanacsantahay sida saaxiibkaa u noolyahay inaad u noolaato, waxaad ku qanacsan tahay in haddii aad shaqo heshay, biilkaaggana ka adag tahay inay kugu filan tahay wax kaa maqanina jirin.

Hodannimada iyo dariiqeedu taa wuu ka duwan yahay, Qofka hodanka ah hammigisiisu wuu sarreeyaa, marwalba halka uu taagan yahay mooyee, meel ka sarraysa ayuu sii hiigsadaa.

Sida uu sheegay Qoraagga kitaabka la yidhaahdo ( the secret of multi millionere) wuxuu ku sheegay inuu jiray nin tababbare ah oo markii hore dakhligiisu ahaa 250,000usd sanadkiiba. Muddo saddex sano gudahood wuxuu dakhligiisu gaadhay sanadkiiba 600,000,000usd ( lix boqol oo kun oo milyan) markii la waydiiyay sababtana, wuxuu ku jawaabay shay walba wuxuu is baddalay markaan si wayn u fikiray.

***(everything changed the moment I began to think big).***

Marka fikirkaagu hooseeyo wax qabadkaaguna wuu hoosaynayaa, wax soo saarkaaguna wuu hoosaynayaa.

Waxaad ogaataa inaan aduunyada laguu keenin inaad kaligaa noolaato, waxaa laguu keenay inaad aduunyada wax ku soo biiriso oo aad noqoto xubin firfircoon oo wax soo kordhisa, oo ka qayb qaadata horumarka dalkiisa iyo dadkiisaba. Aduunyadani uma baahna dad badan oo hammigoodu hooseeyo. Waxaa la gaadhay waqtigii aad dib u gurashada joojin lahayd ee aad hore u socon lahayd. Waxaa la gaadhay waqtigii aad wax hoggaamin lahayd ee aad la hogaamiye ka bixi lahayd, waqtigii aad wax bixin lahayd ee aad joojin lahayd wax waydiisiga ama baryada.

Guud ahaan waxaa la gaadhay waqtigii ciyaarta dhinaca wayn aad ka ciyaari lahayd ee aad joojin lahayd inaad ciyaarta dhinaca hoose ka ciyaarto.

Ka soo qaad inaad tahay Container hantida lagu kaydiyo, haddii kontainerkaagu yaryahay hantida aad helaysaanna badan tahay, maxaa dhacaya? Waxaan shaki ku jirin in marka kontainerkii buuxsamo ay lacagta dheeraadka ahi fatahdo oo ay banaanka ku daadato, sidaa daraadeed waxaa fiican in kontainerkaagu uu waynaado si uu wax badan kuugu qaado. Kontainerkaaguna suuragal maaha inuu waynaado illaa hammigaagu waynaado.

## 6. INAAD GUULDARRAYSATO AYAAD KA BAQDAA.

Qodobkan haddii aan diinteena suubban u cuskano
waa mid siiradii rasuuka iyo dhaqankiisii ka hor imanaya
maxaa yeelay, waad maqashay nabigu inta tallaabo ee uu kolba qaadi jiray si uu diintan u hirgaliyo, kuwaas oo noloshiisa halis galin jiray, illaa uu ka hijrooday, kadib markii uu hijroodayna la waajibiyay jihaad oo ah khatarta ugu wayn ee loo badheedho, oo ah laba mid kood in la guulaysto iyo in la shahiido.
Haddaba bal dib naftaada ugu noqo oo qiimee fikirkaaga ma tahay mid marka fikrad fiicani ku soo dhacdo ka baqa hirgalinteeda oo is yidhaadhda naga dhaaf waa intaas oo aan ku guuldarraystaaye?

Haddii aad dabeecaddaas leedahay ogow in qodobkani ku haysto, oo uu dib kuu dhigi doono, noloshaadana ay ka muuqan doonto, is dawee oo imika is gaadh.

Akhristaha qaaliga ahaw miyaanad ogayn adduunyadan markaad imanaysay inaad ka soo baxday hooyadaa caloosheeda oo waqtigaa aad soo baxaysay uu ahaa marxalad cabsi badan oo xasaasi ah, wax kastaaba inay dhacaanna ay suuragal ahaayeen. Markaa waxaan odhan karnaa imaatinka adduunyada ayaaba ku bilaabmay khatar iyo biimo, markaa waxaa fiican in maanta laga bilaabo aad go'aan ku qaadato hirgalinta fikradahaaga fiican adiga oo aan biqin.

Fulinta fikirka fiican haba ahaado fulintaasi mid ay ka dhalan karto khasaare eh, marnaba kuma khasaaraysid fulintaas, laba mid kood uun baa ka dhalanaya inaad faaiido ka hesho oo mashruucaasi si fiican kuugu hirgalo iyo inaad ku guuldaraysato, laakiinse aad khibrad ka hesho, khibradaas oo shaqooyinkaagga mustaqbal ee danbe aad uga faaiidaysan doonto.

Haddii aad sidaa yeelli waydo waxaad dulsaar ku noqon doontaa ama shaqaale u noqon doontaa ciddii talada eebe saarata ee u badheedha hirgalinta fikirkeeda.

Waxaan kuu sheegayaa murti aad u muhiima . ( *guulddarrada oo laga baqo lafteeda ayaaba ah guulddarro teeda ugu xun.Cadawga ugu wayn ee ina haystaana waa cadawga la yidhaa Cabsida*)

Baqaha aad guuldarrada ka baqdaa waxay burburisaa mid kamid ah sifooyinka ugu qaalisan ee aad haysato oo ah kalsoonida nafta.

## 7. WAXAAD KA FIKIRTAA CAQABADAHA OO KALIYA, MARNA KAMA FIKIRTID MIDHAHA DANBE

Waxaa hore loo yidhi:

(Dadka guulaystayaasha waxaa u muuqda midhaha, dadka guuldaraystana waxaa u muuqda caqabadaha (mushkiladaha).

Dadka guulaystayaashu waxay ku kalsoon yihiin awooddooda , waxay ku kalsoon yihiin hal abuurnimadooda, waxay diyaar u yihiin inay khatarta u badheedhaan, maxaa yeelay waxay aaminsan yihiin odhaahda tidhaahda ( The higher the reward the higher risk). Mar kasta oo khatartu sarayso, waxaa sareeya abaalgudka. Dadka hodanka ahi waxay rumaysan yihiin xataa haddii ay khasaaraan in mar labaad ay lacagta dib u samayn karaan, Laakiinse khatarta ay galayaan waa mid daraaso ku dhisan oo laga fiirsaday laguna sameeyay baadhis iyo shaandhayn ee ha u qaadan in khatar qaadashadu tahay mid indho la'aan lagu galayo.

Bal imikana aan eegno dadka faqiirka; Waxay fishaan inay guuldaraysanayaan, Naftooda iyo awooddeeda kuma kalsoona, waxay aaminsan yihiin haddii mashruucani shaqayn waayo in masiibo dhacayso, maxaa yeelay waxay eegayaan oo kaliya dhinaca mushkilada oo kaliya ( they constantly see the obstacles) diyaar uma ah inay khatarta u badheedhaan, haddii aad tahay mid sidan ku sifaysan ogow inaad tahay mid xoriyadiisa ku doortay dariiqa faqriga.

## 8. WAXAAD KU LIIDATAA BANDHIGIDA QIIMAHAAGA IYO QIIMAHA WAX SOO SAARKAAGA.

Adigu naftaada dib u qiimee, oo is waydii ma tahay qof waxa uu haysto ee uu doonnayo inuu dadka ka iibiyo bandhigi kara oo ku qancin kara dadka kale? Haddii aad sidaa tahay waxaad ka mid tahay qof samayn kara dhaqaale.

Waana habdhaqanka dadka horumarka gaadhaa ay leeyihiin, waana sir kammida siraha ay horumarka ku gaadheen, laakiin dadka faqiirka ahi aad bay ugu liitaan inay soo bandhigaan qiimahooda iyo qiimaha alaabta ay iibinayaan. Xataa haddii ay dahab hayaan ma laha kalsooni ay dadka ugu sheegaan inay dahab hayaan, aqoontooda iyo hibooyinkoodana ma bandhigi karaan.

Hadii aad kammid tahay kooxdan ogow inaad leedahay sifo kammida sifooyinka faqriga keena.

## 9. MUSHKILADAHA AYAA KAA AWOOD BADAN.

Sida la wada ogyahay inaad hodan noqotaa maaha mid fudud waa mid ay ka horreyso dhibaato fara badan iyo caqabado badan, kuf iyo kac, khasaare,daal , fikir joogto ah, sidaas awgeed ayaa dadka faqiirka ahi waa qaar aan mushkiladahaas u adkaysan Karin una babac dhigi Karin, waayo mushkilada ayaa ka wayn, halka dadka

hodanka ahi ay iyagu mushkilad kasta ay ka wayn yihiin oo ay dusha u ridanayaan, maxaa yeelay waxaa u muuqda midhaha.

Dadka dhibta dusha u rita waa qaar u dhaqma sida qisadani tilmaamayso ee ila akhriso:

Waxaa jiray nin beeroole ah, ninkani galabtii ayuu wixii uu alaab hayay oo dhan faraskiisa kusoo raray, isaga oo dariiqa socda faraskiisiina uu hor socdo ayaa si lama filaana faraskii ugu dhacay ceel dheer oo dariiqa badhtankiisa ka qodnaa, ninkii faraska lahaa inuu ka soo saaro ayuu isku dayay, laakiin nasiib darro way u suurroobi wayday, wuxuu u yeedhay dadkii jaarka ahaa si ay u caawiyaan, jaarkiina way ka quusteen, markaa waxay isla garteen in faraska lagu aaso isla goobta, si aanay cid kale wax ugu noqon oo isaga uun dhibtu ugu ekaato, waxaa la billaabay in ciidda lagu roggo faraska, faraskii miskiinka ahaa nolol wuu ka quustay mar kuu arkay ninkii raran jiray oo ciidda ku roggaya, cid u maqan oo uu taaggeero ka sugaa inaanay jirin buu yaqiinsa day, waa isaga iyo xeeladiisa, mar kasta oo ciid dusha lagaga shuboba dhabarka ayuu ruxaa, markaasaa ciiddii hoostiisa ku daadataa, wuxuu dhabarka ruxaba oo ciiddiina ay hoostiisa ku daadataba, marmarka ka danbaysa ayuu kor u soo kacaa, dadkii faraska Aasayay uun baa ku warhelay faraskii oo dibadda usoo baxay, sidaana dhimashadii kaga badbaaday.

Qisadan waxa aan ka qaadannaynaa, dadka horumarka sameeyaa waa dad dhibaatada ku dhacaysa dhabarka u ruxa, oo kadibna ay dhinacyada uga kala daadato, laakiin dadka ay mushkiladu ka wayn tahay waa dad marka dhib timaaddaba uu warwar iyo walbahaar dillo

sidaana ku qaada xanuunada sida macaanka, dhiirkarka iwm sidaana ku aasma oo ku dhinta.

Dadka faqiirka waxay ku dadaalayaan inay ka fogaadaan wax kasta oo dhib u keenaya, markay arkaan dhib way ka ordaan, laakiin taasi waxay dhaxalsiisaa in dhibtii ugu waynayd oo faqrigu kamid yahay ay ku dhacaan.

Kolba inta aad xallin karto mushkilad ayaa qiimahaagu kor u kacayaa, kolba inta aad mushkillad xallin karto ayaa waxaa kor u kacaya hantidaada, kolba inta aad mushkilad xallin karto ayay hogaamiyenimaddaadu sarraynaysaa.

Si aad qodobkan uga faaiidaysato ku dhaqan qodobaddan.

## 10. DIB AYAAD SHAQADA U DHIGTAA, OO WAQTIGEEDA MA DHAMMAYSID.

Wax kasta oo aad qabsan lahayd waa Barri, iyo Barri danbe, sidaana waxaa kaaga luma waqti badan oo aad wax ku qabsan lahayd, shaqooyinkii aad dib u dhigtayna way is wada gaadhaan oo kadibna waxaa kugu cuslaata fulintooda.

Fikir fiican haddii aad hayso, waxaad tidhaa Barri baan qaban doonaa, fursadi haddii ay soo baxdo waxaad tidhaahdaa barri baan ka faaiidaysan doonaa, haddii aad caadooyin xun xun leedahay waxaad tidhaadhaa Barri baan ka tagi doonaa. Wax kastaba waa barri iyo mustaqbal.

Cumar Cabdilcasiis ayaa lagu yidhi: iska naso maanta, wuxuu ku jawaabay oo haddii aan maanta nasto goormaan shaqada maanta qaban doonaa, waxay ku yidhaahdeen barri baad qaban doontaa, wuxuu yidhi: oo shaqadii maalin kaliya ayaan dhamayn kari la'yahaye, sidee baan shaqo laba maalmood u dhamayn karaa?

Hanti heli maysid, horumarna gaadhi maysid illaa shaqada maanta aad maanta dhamayso.

Mahmaah ay af ingiriisiga iyo carabigu wadaagaan ayaa tidhaahda, ( don't put till tommow what you can do today). (*shaqada aad maanta qaban karto barri dib ha ugu dhigin)*

Haddii aad sidaa ku sifaysan tahay ogow inaad adiggu faqriga dooratay .

## 11.WAXAAD ISKU HAYSATAA INAAD WAX WALBA TAQAANNO OO AQOON KORODHSI DIYAAR UMA TIHID.

Waa caado iyo dhaqan aad u xun inaad is mooddo inaad wax walba taqaanid, waxay arrintaasi kaa hor joogsanaysaa inaad wax badan oo cusub barato ama ogaato, waxay kugu xidhaysaa jasiirad cid la, ammase jeel aqoon darro ah oo aanad waligaa ka bixi doonnin.

Qofka aamminsan inuu wax walba yaqaano waxaan odhan karnaa wuxuu ku sugan yahay jahli murakab. Waa qof moodaya inuu garannayo, laakiinse aan garannayn. Tusaale ahaan haddii la waydiiyo oo la yidhaahdo Tiirarka islaamku waa imisa? Wuxuu ku jawaabaa: waa afar.

Nin carab ah oo gabayaaya ayaa wuxuu yidhi.

*Hadii aanad wax garannayn waa masiibo, haddii aanad garannayn inaadan waxba garanaynna musiibaddu way ka sii wayn tahay.*

فإن كنت لا تدرى فتلك مصيبة *** وإن كنت لا تدرى أنك لا تدري فالمصيبة أعظم

Qofka jahliga fudud hayaanna waa qofka marka su'aal aanu garannayn la wayddiiyo odhanaya ma garannayo. Markaa labada qof faraq wayn baa u dhexeeya oo ah ka hore uma haystaba in aqooni ka dhiman tahay, halka ka kale uu had iyo jeer aqoon raadinnayo, waayo wuxuu is ogyahay inaanu garanayn.

Dadka faqiirka ahi had iyo jeer way isla saxan yihiin, oo waa dad isla wayn, taasina waa ta keentay inuu taagnaado meesha uu taagan yahay, halka dadka horumarka sameeyaa ay yihiin dad maskaxdoodu furan tahay oo mar kasta diyaar u ah inay wax cusub bartaan oo ay cid kasta wax ka bartaan.

Dr Ibraahim alfiqi ayaa yidhi: (waxaan jecelahay inaan wax walba barto oo aan cid kasta wax ka barto).

ILAAHAY shay kaliya ayuu Nabiga naxariis iyo nabagelyo korkiisa ha ahaatee amray inuu korodhsi waydiisto kaas oo ah cilmi.

**(وَقُلْ رَبِّ زِدْنِي عِلْمًا)**

***( ILAAHAYOOW cilmi ii siyaadi)***

Haddii aan soomaali nahay waxaa tusaale inoogu filan labada shirkadood ee ugu waawayn gayiga soomaalidu dagto oo kala ah

Dahabshiil iyo Hormuud looga yaqaan koonfurta, Golis looga yaqaano puntland, Telesom looga yaqaano Somaliland,

labadaa shirkadood waxay had iyo jeer ku daddaalaan inay aqoon cusub bartaan, in maskaxdoodu furnaato oo cid kasta oo ay wax ka baran karaanna soo dhawaystaan. Taasina waa sirta ka danbaysa horumarkooda iyo guushooda.

Bal ka warama haddii ay aammini lahaayeen inay wax walba yaqaanaan, ma gaadhi lahaayeen heerka maanta ay gaadheen oo ma bixin lahaayeen adeegyada casriga ah ee maanta ay bixiyaan.

Aqoonyahanka wayn ee horumarka bulshada ee lagu magacaabo Jim Ron ayaa wuxuu yidhi: ( if you keep doing what you have always done, you will keep getting what you, ve always got)

*( haddii aad samaynta shay kaliya uun ku celceliso, waxaad waliggaaba heli uun wixii aad markii horeba heli jirtay wax lamida).*

Sidaa awgeed waxaad u baahantahay in aad wax badan barato si aad u horumarto oo aad waxbadan u hesho.

Saynisyahannadu waxay caddeeyeen in shay kasta oo dunida yalaa uuna xaalad kaliya ku sugnayn ee uu si joogta ah u dhaqdhaqaaqayo.

Haddii geedku aanu ahayn mid koraya wuu dhintaa, haddii biyuhu ayna soconna way uraan, markaa adigguna haddii aad caqliggaaga aqoon ku korin waydo waad dumaysaa.

Wuxuu yidhi Caalimka la yidhaadho Erict Hoffer ( the learners shall inherit the earth, while the learned will be beatifully equipped to live in a world that no longer exist)

Hadalkaa oo macnahiisu yahay: ***( dadka wax bartaa waxay dhaxllaan dunida, halka dadka mooda inay wax yaqaannaana ay yihiin qaar ku nool dunni hore oo tagtay oo aan waqtiga la socon).***

***Dadka soomaalidda waa dad aan wax akhriyin, sababtu waxay tahay waa iyaga oo isku haysta in aanay waxba ka maqnayn.***

*Waxaad arkaysaa qofkii oo jaamacad ka baxay, laakiin maalinta uu jaamacadda ka baxo ayaa wax akhris ugu danbaysa, sababtu waa isaga oo is moodaya inuu wax bartay, Alla yaa miskiin, miyaanad ogayn jaamacaddu inay tahay kaliya furihii lagu furanayay aqoonta, markaa waxaad ka dhigan tahay nin furihii haysta oo haddana aan gudaha guriga u gallayn oo aan ka faaiidaysanayn wixii guriga hoos yaalay ee faa'iidada lahaa.*

Markaa haddii aad tahay mid is moodaya inuu wax walba yaqaano oo aanad diyaar u ahayn inaad si isdaba joog wax u barato ama qof kaa waaya aragsan ka barro ama buug ka akhrisee, ogow inaad dariiq kamida dariiqyada faqriga ku taagan tahay, waayo halka aad taagan tahay kama horumaraysid.

## 12. DAD XUN XUN AYAAD XIDHIIDH LA LEEDAHAY

Dadka aad xidhiidhka la leedahay waa dad fikirkoodu aad u hooseeyo, waa dad nolosha ka dhacay oo wax horumar ah aan samayn.

Horaa loo yidhi, shimbirba shimbirkiisuu la duulaa,

Nabiguna waxa uu yidhi  naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yidhi: "

"المرء على دين خليله فلينظر أحدكم من يُخالِل

(*Qofka diintiisu waxay noqotaa sida uu yahay qofka saaxiibkiiye midkiin ha eego cidda uu la saaxiibayo*)

Dadkani isku si bay u fikiraan, isku si bay u labistaan, isku si bay u noolyihiin, isku si bay wax u qabtaan, isku sina way u guuldarraystaan, isku sina qaddarka ayay u dhalleeceeyaan (*noloshan ilaahay baa noo qaddaray*).

Dhalinyarta balwada leh, haddii aad wayddiiso yaa ku baray ? wuxuu ku odhan saaxiibkay baa i baray.

Sida uu saaxiibka xuni balwadda kuu barayo ayuu dhaqan kasta oo xun kuu barayaa, marka danbena nolosha ayaad ka dhacaysaa, marka aad is dareentana way kugu adkaannaysaa sidii aad dib ugu soo noqon lahayd.

Dadka kale ee guullaystayaashu iyagu waa dad nasiib u helay inay dadka fiican la xidhiidhaan oo ay la saaxiibaan, oo ay ka bartaan wax fiican, oo ay ka bartaan dariiqa ay iyaguba guusha u mareen

Nabiguna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuu kala sheegay saaxiibka xun iyo ka wanaagsan

**إنَّمَا مَثَلُ الجليسِ الصالحِ والجليسُ السوءِ كحامِلِ المسك،**

**ونافخِ الكيرِ فحاملُ المسك: إما أن يُحْذِيَك، وإما أن تبتاع منه،**

**وإمَّا أن تجدَ منه ريحا طيِّبة،**

**ونافخ الكير إما أن يحرق ثيابك، وإما أن تجد منه ريحا خبيثة**

Xaddiiska macnahiisa guud ahaan ( saaxiibka wanaagsani wuxuu ka dhigan yahay nin haysta cadar udgoon, markaad la saaxiibto am cadarka ayuu ku siin amase urtiisa ayaa ku soo gaadhi

Saaxiibka xunna wuxuu ka dhigan yahay nin la saaxiiba ninka birraha tuma ee buufimada ku afuufa si uu dabka ugu shido, markaa laba mid uun bay noqon inuu maryaha kaa gubo amase in ur xunni kaa soo gaadho.

Kani waa tusaale si fiican u caddaynaya faraqa u dhexeeya labada saaxiib

Saaxiibka wanaagsan wax baad ka baran, fikrad fiican baad ka faaiidaysan, khayrka iyo wanaaga ayuu ku xasuusin, xumaanta ayuu kuu diidi, dariiqa uu guusha iyo hantida ku helay baad ka baran.

Saaxiibka xunse waxaad ka baran fikrado khashin ah oo liita, oo dhaawac gaadhsiinaya maskaxdaada.

Dr Ibraahim Afiqi sida uu ku sheegay kitaabkiisa la yidhaahdo Awoodda fikirka: waxa uu yidhi isaga oo la hadlayaa dadkii uu tabbarka siinayay; ma waxaad jeceshihiin inaad hotelka cuntadiisa cuntaan, mise ta guriga, mise ta gudaafada taala (qashin qubka)

Dhamaan waxay ku jawaabeen, ta hotelka qaar kalena ta guriga, qof kaliya oo yidhaahda cuntada qashin qubka taala ayaan cunayaa wuu waayay.

Wuxuu yidhi: oo haddaba haddii calooshiina aad u diiddeen inaad cunto liidata galisaan, maxaad maskaxdiina ugu ogolaateen fikradaha xun xun ee khashinka ah inaad galisaan.

Saaxiibka xun waxaad ka faaiidaysaa waa fikrado khashin ah.

Haddaba dib u eeg dadka aad saaxiibka la tahay, haddii ay yihiin qaar liita sida ugu dhaqsaha badan leh u baddal, haddii kale adiga ayaa xoriyaddaada ku doortay dariiq kamidda dariiqa faqriga.

Si aad qodobkan uga faaiidaysato.

1- Bal dib u eeg dadka aad saaxiibka la tahay. Ma yihiin qaar horumar gaadhay ama cilmi haka gaadhaan ama dhaqaale ama siyaasade? Ma yihiin qaar cibbaadada Alle ku fiican? Haddii ay saaxiibaddaa kuwaa aan soo sheegnay ahayn, waxaad ogaataa inaad dariiq qaldan taagan tahay darajada aad heshayna waa eber
2- Ka fikir sidii aad dagdag ugu baddali lahayd saaxiibaddaa oo aad dad cusub oo wanaagsan ula saaxiibi lahayd.
3- Go,aan adag qaado maanta laga bilaabo aannad dib danbe u raaci doonnin, ula sheekaysan doonnin dadkaa aan fiicnayn.

## 13. WAXAAD DHAGAYSATAA FIKRADAHA AAN XAQIIQDA KU FADHIYIN. ( You listen the Ideas not the facts).

Talooyinka aan xaqiiqada ku fadhiyin waxaa dhaanta talo la'aanta. Cidda aad talo iyo waano ka dhagaysannaysana iska fiiri, haddii aad doonnayso inaad guursato oo aad talo guur doonayso haka dhagaysan nin aan waliggii guursan, haddii aad doonnayso talo ganacsi ha ka dhagaysan cid aan ganacsi si dhab

ah u samayn kuna guulaysan, haddii aad doonnayso talo dhakhtarnimo haka dhagaysan cid aan dhakhtarnimada khibrad u lahayn.

Haddii aad haddaba adiguna tahay mid jecel inuu wax kasta iska dhagaysto oo run u qaata ogow inaad tahay mid aan horumar dhaqaale samayn karin

Baro kala soocida waxa dhabta ah iyo waxa aan dhabta ahayn. Dad baa markay hadlayaan iska hadla uun iyaga oo mawduuca ay ka hadlayaan wax cilmi ah u lahayn,kuwaa warkooda ha rumaysan, hana ku dhaqmin.

Haddaba haddii aad tahay mid wax walba run mooda oo aan kala saari Karin xaqiiqada iyo mala'awaalka, waxay taasi ku dhaxalsiinaysaa inaad go'aano qaldan qaadatid, go'aanadaasina ay jar kaa tuuraan, sidaana aad ku guuldarraysatid, dariiqii faqrigana sidaa ku dooratid oo aad faqiir ku danbaysid.

Si aad uga faaiidaysatid

1- Bal ka fikir inta jeer ee aad fikir qof qabo aad dhagaysatay ee aad ku dhaqantay kadibna aad ku guuldaraysatay. Isku qiimee qodobkan darajo intee le,eg baad ka keenaysaa
2- Maanta wixii ka danbeeya hadalka ka fiirso cidda aad talada waydiinayso, iyo qofka fikirkiisa aad qaadanayso oo kala sooc inuu yahay hadal la iska yidhi oo qofku aragtidiisa uun ku cabirrayo iyo inuu yahay xaqiiq dhab ah oo waaqica waafaqsan

## 14.WAXAAD TAHAY MID CAAJIS AH OO HURDO BADAN.

Waxaa jira dad caajisiin ah oo laga yaabo inaad kamid tahay.
Waxaad doonaysaa inaad goosato beer aanad qodan.
Dariiq gaaban baad doonaysaa inaad qaninimada kaga soo boodo
Nolosha wax kasta oo fiican inaad hesho ayaad doonaysaa adiga oo aan u daalin
Wax kasta oo kuu qabsoomi waayana cudur daar baad u samaysaa
Wuxuu yidhi Dictoor Brian Tracy kitaabkiisa ( getting rich your own way)
Haddii aad naftaada ka adkaato noloshu waxay kuu noqonaysaa mid sahlan, haddiise ay naftaadu kaa adkaato noloshu way kugu adkaani).
Ogowna in caajisnimada uu nabi maxamed naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee ka magan galay .

اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْهَمِّ وَالْحَزَنِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنَ الْعَجْزِ وَالْكَسَلِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنَ الْجُبْنِ وَالْبُخْلِ، وَأَعُوذُ بِكَ مِنْ غَلَبَةِ الدَّيْنِ، وَقَهْرِ الرِّجَالِ

Arimaha ugu waawayn ee in laga magan gala ah waxaa kamida caajisnimada sababtoo ah waa saamaynta xun ee ay qofka nolohiisa ku yeelanayso. Haddii qofku caajis noqdo aduun iyo aakhiraba wuu khasaaray, waayo labaduba waxay u baahan yihiin dadaal iyo shaqo badan, taasina maaha mid qofka caajiska ahi uu qaban karo.

Caalimka wayn ee la yidhaa Ibnu qayim ayaa wuuu ku sheegay kitaabkiisa la yidhaahdo mutaaxu daaru sacaada hadalka hoos ku qoran

**ال ابن القيم رحمه الله في كتابه [مفتاح دار السعادة]**
**"المصالح والخيرات واللذات والكمالات كلها لا تنال إلا بحظ من المشقة ولا يعبر إليها إلا على جسر من التعب وقد**
**أجمع عقلاء كل أمة على أن النعيم لا يدرك بالنعيم وإن من آثر الراحة فاتته الراحة وإن بحسب ركوب الأهوال**
**وإحتمال المشاق تكون الفرحة واللذة فلا فرحة لمن لا هم له ولا لذة لمن لا صبر له ولا نعيم لمن لا شقاء له ولا راحة**
**لمن لا تعب له بل إذا تعب العبد قليلا استراح طويلا وإذا تحمل مشقة الصبر ساعة قاده لحياة الأبد**
**وكل ما فيه أهل النعيم المقيم فهو صبر ساعة والله المستعان ولا قوة إلا بالله**

*(arimaha wanaagsani, khayrka, iyo nolosha macaankeeda iyo dhamaystirankeeda laguma gaadho wax aan ka ahayn dhib, biriishka loo sii marayaana waa daal iyo rafaad.*
*Dadka caqliga leh dhamaantood waxay isku waafaqeen: In aan raaxo lagu gaadhin raaxo, ninka door bida raaxaadana in raaxadii uu waayayo, kolba inta ay le,egtahay dhibta iyo rafaadka iyo dulqaadka aad u dulqaadataa ayay heerka farxadaada iyo noloshaada macaankeedu gaadhaysaa.*
*Farxadi uma sugna nnka aan hammi lahayn, macaanna ma helo ninka aan samir lahayn, nimcana ma helo nnka aan daalin. Bal marka uu addoonku waxoogaa daalo ayuu nastaa, marka uu u dulqaato dhibta saacad ayay nolol abbadiya uu helaa. Dadka ku sugan nimcooyinku waa sabir ay saacad soo sabreen. Llaahay ayaan gargaar waydiinsanynaa xeelad iyo awood midna ma lihin)).*

hadalkaa caalimka wayn ee ibnu qayim ayaa waano inoogu sugan, wax ka

fiicn hadalkiisa oo la sheegi karaa iima muuqda, wuxuu sheegay murti aad u qiimo badan oo ah mid cibro qaadasho mudan.

## 15.WAXAAD TAHAY MID ISLA WAYN OO KIBIR BADAN

Maadaama aad kibirsan tahay ma dhagaysatid fikradaha fiican.

Sababta keentay inaad noqoto mid isla wayn waa adiga oo aan waxba noloshaada ku guullaysan sidaa daraadeed isla wayni ayaad ku qarinaysaa guuldarraddaada. Waxaad iska dhigaysaa inaad cid walba ka sarayso , ka cilmi badan tahay, ka caqli badan tahay.

Dadka guullaystayaashu dhamaantood waa dad is dhul dhigid badan ( humbles).

Kibirkaasina wuxuu ku seejinayaa inaad dadka kale ka faaiidaysato, wax ka barato, talooyinka fiican dhagaysato, taasina Kibirka diinteenu meel adag bay iska taagtay

Nabigu wuxu yidhi:

لا يَدْخُلُ الْجَنَّةَ مَنْ كَانَ فِي قَلْبِهِ مِثْقَالُ ذَرَّةٍ مِنْ كِبْرٍ، قَالَ رَجُلٌ: إِنَّ الرَّجُلَ يُحِبُّ أَنْ يَكُونَ ثَوْبُهُ حَسَنًا، وَنَعْلُهُ حَسَنَةً، قَالَ: إِنَّ اللهَ جَمِيلٌ يُحِبُّ الْجَمَالَ، الْكِبْرُ بَطَرُ الْحَقِّ، وَغَمْطُ النَّاسِ

*(Jannada ma galo qof uu qalbiggiisu ku jirto wax yar oo le,eg qudhaanta oo kibir ahi)*

Nabi muxumedna waa Rasuulkeennii aduun iyo aakhiraba waxba kama tagin, wixii wanaag inoo ahaa wuu inoo sheegay wixii shar

ahaana wuu inooga digay, kibirku wuxuu kamid yahay arimaha uu inooga diggay.

Markaa kibikru aakhiro iyo aduunba waxa uu keenaa cidhib xumo.

Ku dhaqan qodobaddan

1- Is qiimee ma tahay nin dadka iska waynaysiiya, gaar ahaan dadka masaakiinta ah, haddii aad sidaa tahay qodobkan waad ku dhacday ee darajada horta qaaddo imika
2- Go,aan dagdag u qaado inaad wixii imika ka danbeeya aanad kibir danbe la iman doonin
3- Samee arimo baddan oo markii hore aad iska kibrisiin jirtay oo nafta ku tababar

## 16.WAX MA DHAGAYSATID EE WAXAAD JECESHAHAY IN ADIGA UUN LAGU DHAGAYSTO.

Dhagahaaga ma istimaashid ee kaliya waad hadashaa uun

ILAAHAY wuxuu laba dhagood inoo siiyay iyo hal Af, waa inaan dhagaysano in ka badan inta aan hadallo.

Dhagaysigu waa dariiqa loo maro cilmiga, Baro inaad wax dhagaysato, dhagayso kuwa kaa aqoon badan, waxaan shaki ku jirin inaad ka faaiidaysanayso,

Haddiibase aad dabeecaddaas baddali waydo taasi waxay ku dhaxalsiinaysaa inaadan wax horumar ah ka samaynin shaqada aad hayso, maxaa yeelay cidna waxba kama maqashid ee adiga uun baa jecel inaad hadasho.

Aamusku waa shay aad u qiimo badan oo faaiido wayn noloshaada u leh aduun iyo aakhiraba.

Nabigu wuxuu yidhi:

عن أبي هريرة رضي الله عنه ، عن رسول الله ﷺ قال:
من كان يؤمن بالله واليوم الآخر ، فليقل خيرا أو ليصمت ، ومن كان يؤمن بالله واليوم الآخر ، فليكرم جاره ، ومن كان يؤمن بالله واليوم الآخر ، فليكرم ضيفه رواه البخاري ومسلم .

Haddii aad dabeecaddan baddali waydo, oo aad hadal badan daldasho ogow in hadalkaasi uu kuu soo jiidayo shar fara badan aduun iyo aakhiraba. Waxaanad ku danbayn doontaa inaad guuldarraysato

Qodobadan ku dhaqa

1- Adiga oo ka shidaal qaadanaya qodobkan qiimee naftaada oo darajo sii
2- Haddii aad tahay mid markii hore hadal badnaa imika laga bilaabo go,aan ku qaado inaad hadalka iska yarayso, oo inta aanad hadal aad ka fikirto hadalkaaga ma yahay mid khayr leh mise maaha mid khayr leh.

## 17.HADALKA DADKA AYAA KU SAAMEEYA

Ila akhri qisadan inta aynaan mawduuca ka hadal

Koox Raha oo xareed ka dharagtay ayaa iyaga oo koox koox u wada socda laba kamid ahi ay ceel dheer oo biyo ka buuxaan ku dheceen. Labadii rah waxay isku dayeen inay dibadda u soo baxaan, laakiinse

ceelka oo dheeraa awgeed way kari waayeen. Kooxdii raha ahayd ee iyagu ka badbaaday inay ceelka ku dhacaan ayaa waxay dul yimaadeen ceelkii ay saaxibaddood ku jireen, waxayna arkeen iyaga oo isku dayaya inay dibadda usoo baxaan , waxaa nasiib daro noqotay halkii laga sugayay inay caawiyaan oo siddii ay uga soo bixi lahaayeen ceelka ay talo ka siiyaan ayaa waxay yidhaahdeen: waxba ha is daalinnina iskana aqbala dhimashada, noloshana intii hore ayaa idinku fillan ee aayar si fudud iskaga dhinta. Hadalkaas ayay ku celceliyeen, mid kamida labadii rah wuu iska aqbalay hadalkoodii wuuna joojiyay isku daygii ahaa inuu kor u soo boodo, wuxuuna aaminay wixii ay saaxiibaddii kula taliyeen halkaana wuu ku geeriyooday. Rahii kale isagu dheg uma dhigin hadalkoodii ee wuxuu sii waday isku daygiisii ahaa inuu kor u soo boodo, kuwii saaxiibaddii ahaana mar kasta oo uu kor u soo booddaba way ku qaylyayaan oo waxay yidhaahdaan waar hebelba wuu is dhiibee waxba ha is daaline' ee iska oggolow dhimashada, laakiin isagu warkooda dheg jalaq uma siine siddii uu booddadii u waday wuxuu ku guulaystay ugu danbayn inuu dibada usoo boodo.

Markii uu dibada usoo baxay waxaa la ogaaday in Rahan badbaaday uu ahaa mid dhagala' oo aan maqlaynba hadalkii ay kula hadlayeen, taasina ay sabab u noqotay inay ka badbaadiso halaag iyo geeri.

Qisadan waxaan ka qaadanaynaa: in Dadku ciddii dadaalaysa ee fikir fiican wadata ay had iyo jeer ka hor yimaadaan oo ay isku dayaan inay niyad jabiyaan.

Waxaa kale oo aan ka qaadannaynaa in dadku laba ay u qaybsamaan; qolo maqasha hadalka dadka oo ka tanaasusha himiladii iyo hiigsigii uu waday halkaana fikirkoodii fiicnaa ku dhinto.

Qolo kale oo iyagu hadalka dadka dhegaha ka furaysta oo ku mashquulsan hirgalinta hiigsiggoooda iyo himiladdooda. Kuwa noocan ahi waa kuwa had iyo jeer nolosha guulaha waawayn ka gaadha.

Akhristoow haddii aad tahay mid leh himilo ama hiigsi ha u dhaga nuglaan dadka iyo hadalkooda, waxaanad ogaataa dadku marka ay hadlayaan inay ka hadlayaan aragtidooda gaar ah ee aanay war ka haynin himiladdaada iyo hiigsigaaga, waxaa kale oo aan halkan ka caddaynaya kalmad halhays u noqotay somaalida, taas oo ah

( sidaad is mooday maahee waa sida ay dadku kuu arkaan).

Anigguna waxaan ku leeyahay sida ay dadku kuu arkaan ma tihide waa sida aad adigu iska dhigto.

Waxaana marag ii ah dadka horumarka sameeyay dhamaantood ama ha noqdaan siyaasi caan ah, ama ha noqdaan maalqabeen eh, ama ha noqdaan dad cilmiga meel sare ka gaadhaye, dadkaasi ma siddii dadku u arkayeen billowgii hore bay noqdeen mise si ka duwan? dadku miyay bilawgii hore aaminsanaayeen inay meeshaa ay gaadheen gaadhi doonaan, mise way la yaabannaayeen oo marka ay u sheegaan ee ay yidhaahdaan waxaas ayaan doonayaa inaan noqono, way ku qosli jireen, adiga ayaan kaa sugayaa jawaabta.

Qof kastaaba waa halka uu isagu is dhigo, dadka nin walba tiisa ayuu wataa ee taada waxba kama galin, markaa isaga haddii aad ka sugto inuu kolba meesha uu ku dhigo aad aqbasho wuxuu ku dhigi cagta hoostiisa guuldaradii ugu waynaydna waad ku dhici

Markaa haddii aad tahay mid hadalka dadka u nugul ogow inaadan horumar samayn Karin.

Ku dhaqa qodobaddan

1- Qodobkan si fiican marka hore u fahan, kadibna naftaada ku qiimee. Darajano isa sii
2- Haddii aad tahay mid marka hore ahaa in hadalka dadku saameeyaan oo hiigsigiisa iyo yoolkiisa iyaga daraadood uga hadha, maata laga bilaabo bilaw inaad dhegaha ka furaysato ilaa inta aad ka xaqiijinayso yoolkaaga.

## 18.SHAQADAADA UMA HAYSID JACAYL XOOGAN IYO XAMMAASAD XOOGAN ( DHAQAAJIYE XOOGAN) (You are not motivated)

**Dhaqaajiyuhu wuxuu ka dhigan yahay sida dabka oo kale, dabku marka dhariga lagu shido wuu dhaqaajiyaa oo wixii ku jiray ee qaydhnaa buu bisleeyaa, xammaasaduna waxay karisaa awoodda qofka ku kaydsan ee hurudda oo qofka shaqadiisa niyad xoog ah u hayaa wuxuu isticmaalaa awooddiisa oo dhan taasina waxay keentaa inuu wax badan muddo yar gudaheed ku**

**qabto, dhaqaajiyahana waxaa keena doonis adag ama jacayl xooggan oo aad shaygaa u qabto.**

**Dr ibraahim Alfiqi ayaa kitaabkiisa la yidhaahdo Tobanka fure ee guusha wuxuu ku sheegay qiso ka turjumaysa ahmiyada ay xammaasaddu ama dhaqaajihuhu ( motivation) uu u leeyahay horumarka iyo inay taasi tahayba sirta guusha. wuxuu yidhi:**

((li ogolow inaan kaaga qisooddo ama kaaga sheekeeyo wiil yar oo u tagay mid kamida ragga ugu xikmadda badan, si uu uga barto sirta guusha

Wiilka yar: xikmad badannoow maxay tahay sirta guusha lagu gaadhaa?

Xikmad badane : sirta guushu waa doonis xoogan

Wiilkii yaraa: oo halkee ka timaadaa doonista adag ama maxaa dhaliya?

Xikmad badane : doonis huraysa oo holcaysa sida dabka.

Wiilkii yaraa: oo sidee ayay inoogu dhalanaysaa doonistaa adagi?

Xikmad badne: wuxuu ka idan dalbay wiilkii yaraa daqiiqado yar. Wuxuuna soo qaaday weel aad u wayn oo biyo ka buuxaan, markaasuu wiilkii yaraa waydiiyay oo uu ku yidhi ma iga hubtaa inaad doonayso inaad ogaato waxa dhaliya doonista adag

Wiilkii yaraa: haa

Wuxuu xikmad badanihii ka dalbay wiilkii yaraa inuu weelka usoo dhawaado kadibna fiiriyo, wiillkii yaraa oo fiirinaya ayuu odaygii si lama

filaana wiilkii yaraa intuu madaxa qabtay ugu muquuray biyihii, dhawr ilbidhiqsi ayuu sidaa ugu hayay, kadib wiilkii yaraa markuu neefqabatoobay ( naqasku ku dhagay), ayuu si degddeg ah wuxuu awood lahaa oo dhan isticmaalay, iskana furfuray, isaga oo cadhaysana ku yidhi eeyaahee waa maxay waxaad samaynaysaa?.

Odaygii ayaa isaga oo deggan oo dhoolacadaynaya ku jawaabay: maxaad ka baratay tijaabadan?

Wiilkii yaraa ayaa ku jawaabay: waxba kama baran haba yaraatee. Odaygii ayaa intuu wiilkii yaraa fiiriyay ku yidhi: wax badan baad ka baratay, daqiiqadihii ugu horeeyay waxaad doontay inaad madaxaaga biyaha ka soo saarto, laakiin doonistaadu ma ahayn mid xooggan, mana aanad wada isticmaalin awooddaada, laakiin ugu danbayntii markaad halis gashay waxaad isticmaashay awooddaada oo dhan, si aad naftaada u badbaadiso, waanad ku guulaysatay arrintaas, maxaa yeelay cidina awood uma lahayn inay ku horjoogsato. Hadaba wiilyohow marka doonistaadu gaadho heerkaa waxaad gaadhi guul.

Waxaan qisadan ka faaiidaysanaynaa in doonista adag ay tahay qaacidada ugu horeysa ee guusha lagu gaadhi karo. Waa abuurka midheed ee dhulka guusha lagu beero. Sirta guushuna waa dhaqaajiye (motivation) ama inaad hesho wax ku dhaqaajiya.

Adigu markaa waxaa faqiir kaa dhigay shaqadaada uma haysid niyad xoog ah iyo jacayl xad dhaaf ah, waad iska tagtaa wax baad yara qabataa, waad iska soo rawaxdaa, galabtiina maqaaxiyaha ayaad siyaasad kaga sheekaysaa, noloshaaduna intaa ayay ku wareegtaa.

Hadana waxaad ka cabannaysaa faqri iyo lacag yaraan.

## 19.GO,AAN IYO DHIIRANI UMA HAYSID SHAQADA

Kaama go'na fulinta qorshahaaggu duruuf kasta oo jirta,
Dhiirannidu waa inaad leedahay awood iyo niyad adayg aad ku waajihi karto xataa shabeelka adiga oo aan wax hub ah haysan, haddii ay taasi keenayso inaad hadafkaaga ku xaqiijinayso.

Tusaale ahaan

Qofka doonaya inuu noqdo Feedhyahan waa inuu

Will ( doonis adag) u leeyahay sidii uu u noqon lahaa Feedh yahan

Go,aan adag u leeyahay sidii uu Tababar adag u qaadan lahaa

Dhiiranaan u yeelan lahaa sidii uu u waajihi lahaa cadawgiisa oo aanu u biqi lahayn.

Saddexdaasi waxay muhiim u yihiin xaqiijinta yoolka aad u socoto xaqiijintiisa

Markaa adigu waxaad faqri u noqotay saddexdaa arimood uma lihid shaqaddaada, sidaana waxaad ku dooratay dariiqii faqriga.

Dabaqa qodobadan hoose

1- Marka hore naftaada ku qiimee qodobkan, kadibna darajo isa sii
2- Haddii marka hore ahayd mid aan shaqadiisu aanay ka go,nayn imika laga bilaabo go'aan adag qaado sidii aad shaqadaada ugu yeelan lahayd dhiiranaan iyo calool adayg aad ku dhamayso wax kasta oo shaqo kuu taala.

3-

## 20. WAXAAD AAMINTAY FAQIIRTINIMO.

Haddii aad dhalatay adiga oo indha la, ama dhagala, ama lugala, ama gacma la, ama aad ka dhalatay qoyska dunida ugu faqiirsan, taasi sabab u noqon mayso inaad faqiir noqotid, laakiin sida aad maanta tahay marka aad eegto ayaa laga yaabaa in aadan ahayn mid dhaqaaalihiisu dhisan yahay, haddiise aynu eegno awoodaha Alle ku siiy waxaad tahay mid aad qani ah. Dhibtuse waxay tahay waxaad tahay mid maskaxda faqiir ka ah, maxaa yeelay waligaa kamaad fikirin inaad awoodahaagga qarxiso oo ad isticmaasho oo aad ka faaiidaysato.

Dadka dunida ugu guulaha waawayn qaarkood waxay dhasheen iyaga oo curyaano ah, sida ninka la yidhaadho Germen composer lud wig Beethoven. Wuxuu ahaa mid dhagala.

Ma eegtid umana fiirsatid nimcooyinka waawayn ee agtaada yaala iyo deeqaha waawan ee ilaahay ku siiyay; Ma eegtid maskaxda ilaahay ku siiyay iyo qaadkeeda iyo fikradaha qiimaha leh ee maalin walba ku soo dhacaya Kamana faaiidaysatid.

Ma taqaanid mana ogid sida looga faaiidaysto dadka kugu xeeran, laga bilaabo qoyskaaga, jaarkaaga, saaxiibadaa, dadka cusub ee aad is ku barataan baska dhexdiisa, dadka aad isku barataan meelaha maqaaxiyaha, iwm

Qiyaas iska raf ah oo la sameeyay waxaa la ogaaday inuu qof kasta oo inaga mid ahi ugu yaraan yaqaano boqolkun oo qof sidee buu ku yaqaanaa? ka soo qaad inaad adigu taqaanid shan boqol oo qof qof

kasta oo shantaa boqol kamid ahina isaguna yaqaano shan boqol oo qof oo kale, imisa qof ayaad sidaa ku taqaanaa, waxaas oo dhani waa hanti aad haysato, wixii aad aaminto waad ku sifoobaysaa oo noloshaada ayuu ka muuqanaya, ee aaminaada baddal oo aamin inaad Qani noqon karto, haddii kalase waxaad doorotay dariiqii faqriga.

Ku dhaqan qodobadan

1- Naftaada ku qiimee qodobkan, kadibna darajo sii
2- Maanta laga bilaabo Aamin inaad qanni noqon karto, oo kuwa qaniga noqday aanay waxba ku dheerayn ee waxa ay sameeyeen wax lamida aad samayn kartid
3- Maskaxdaada ka masax aaminnaadii hore ee qaldanayd.

## 21.BEENBAAD SHEEGTAA

Waxaad tahay mid caadaystay sheegida beenta, ku raaligaliya dadka beenta, markaasaad noqotay qof aan la isku hallayn Karin. Qof aan hadalkiisa la rumaysan Karin. Haddii aad tahay ganacsade macaamiishaadu kuma aaminaan, haddii aad tahay macalin ardaydaadu kuma aaminaan, haddii aad tahay shaqaale maamulkaagu kuma aamminaan, hadii aad tahay aabe caruurtaadu kuma aaminan,
Sideed markaa horumar dhaqaale u samayn kartaa? Waa su'aal adiga lagaaga fadhiyo inaad ka jawaabto.
Horaa loo yidhi: ( ***Tell nine truths and one lie and you will become famous for that one lie)***

***(Sheeg sagaal runood iyo hal been ah waxaad ku caan bixi halkaa beenta ah.).***

***Beentu akhristaha qaaliga ahaw waa sifo aad u xun oo aduun iyo aakhiraba ku seejinaya, ILAAHAYNA sida aad quraanka ku akhriday wuu nacdalay dadka beenaalayaasha ah.***

***Nabiguna sida uu xadiis ku sheegay.***

**حديث مرفوع) حَدَّثَنَا الأَعْمَشُ ، عَنْ أَبِي وَائِلٍ ، عَنْ عَبْدِ اللَّهِ ، قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ : " إِيَّاكُمْ وَالْكَذِبَ ، فَإِنَّ الْكَذِبَ يَهْدِي إِلَى الْفُجُورِ ، وَإِنَّ الْفُجُورَ يَهْدِي إِلَى النَّارِ ، وَإِنَّ الرَّجُلَ لَيَكْذِبُ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ كَذَّابًا ، وَعَلَيْكُمْ بِالصِّدْقِ ، فَإِنَّ الصِّدْقَ يَهْدِي إِلَى الْبِرِّ ، وَإِنَّ الْبِرَّ يَهْدِي إِلَى الْجَنَّةِ ، وَإِنَّ الرَّجُلَ لَيَصْدُقُ وَيَتَحَرَّى الصِّدْقَ حَتَّى يُكْتَبَ عِنْدَ اللَّهِ صِدِّيقًا. "**

Xaddiiskan macnahiisu wuxuu yahay (Waxaan idiinka digayaa Beenta, Beentu waxay kugu hanuunisaa jika xumaanta, Xumaantuna waxay kugu ridaa Naarta, ruuxuna haddii uu beenta sheegideeda sii wado wuxuu gaadhaa heer ilaahay agtiisa loogu qoro inuu yahay Beenaale.

Waxaad ku dadaashaan Runta, Runtu waxay adoonka ku hanuunisaa wanaagga, wanaagguna wuxuu qofka ku hanuuniyaa Jannada, ninka marka uu ku dadaalo sheegida runta, waxaa ilaahay agtiisa lagu qoraa Run law)

## 22. WAXAAD DOONAYSAA INAAD DEGDEG QANI U NOQOTO.

### Dariiq gaaban ( short cuts)

Aroortii baad beertaa waxaanad jeceshay inaad galabtii goosato. Waxaad jeceshahay inaad orodo ka hor inta aanad socon.

Qisadan ila akhri: Nin beeroole ah ayaa soo maray shimbir kaynta ka dhex heesaysa, beerooluhu wuxuu sitaa sanduuq dirxi ka buuxo, shimbirkii ayaa ninkii beeroolaha ahaa joojiyay oo waydiiyay: ( maxaad sanduuqa ku sidaa xageedse u socotaa)? Beeroolihii baa ku jawaabay oo yidhi: Sanduuqa waxaa ku jira dirxi waxaan doonayaa inaan suuqa geeyo oo aan iibiyo, kadibna aan lacagta ku soo iibsado baalka shimbiraha, shimbirkii ayaa yidhi: oo anigu waxaan haystaa Baalal badan mid aan ku siiyo adiguna dirxi isii si aan uga kaaftoomo inaan dirxi raadiyo, beeroolihii wuu ku waafaqay,dirxigiina wuu siiyay, shimbirkiina baalkiisii buu siiyay, maalintii labaad ayaa haddana beeroolihii soo maray isaga oo sanduuqii dirxigu ku jiray sita, haddana sidii shalay oo kale ayay iswaydaarsadeen dirxigii iyo Baalkii, maalintii saddexaadna sidoo kale, maalintii afraadna sidoo kale, ilaa uu shimbirkii uu noqday bilaa baalal oo dib danbe u duuli kari waayay , wuxuuna noqday mid aad u foolxun, wuuna joojiyay heestii, markii danbena qun yar buu iskaga dhintay.

Nuxurka qisadani way iska caddahay oo waxaa looga jeedaa shimbirku dariiqii uu moodayay inuu fudud yahay ayaa noqday dariiqii ugu adkaa, kaasoo noloshiisii galaafatay.

Tani miyayna nolosheena ku dabaqnayn? In badan waxaan raadinnaa dariiq fudud oo marka danbena isku baddala inuu noqdo dariiqa ugu adag.

Waxaa jira laba dariiqo oo beerta haramaha ( geedaha yar yar ee dheeraadka ah ee beerta ka dhex baxa) af ingiriisigana waxaa la yidhaa (weeds) looga guro midi waa dariiq fudud oo ah in dusha sare laga xiiro, kadibna beertu noqoto mid qurux badan muddo yar, laakiin si dhakhso ah uu Haramihii kusoo noqdo sidiisii. Dariiqa labaadna waa in qofku intuu jilbaha dhulka dhigo, gacantiisa isticmaalo oo xididdada u soo saaro Haramaha ( weeds). Dariiqadani way adagtahay, laakiin haramihii dib uma soo baxayo oo wuu dabar go,ay.

Dadka maanta marka aad u fiirsato waxay doonayaan inay wax walba dagdag u helaan, inay dagdag Qani u noqdaan, inay dagdag cilmi u bartaan, inay dagdag caan u noqdaan, inay dagdag mushkiladaha u xaliyaan,markay taasi u suuroobi waydana way niyad jabaan.

Sidoo kale dariiqa Qaninimadu maaha mid meel gaaban lagaga soo boodo waa mid u baahan waqti dheer iyo dadaal badan iyo waaya aragnimo, qofka arintaa khilaafaana waa qof garab maray dariiqii saxda ahaa.

Kitaabka layidhaahdo Qisooyinka kuwii guulaystay waxaan ku sheegay qisada ninkii ahaa Aabaha warshadaha ee dalka jabaan, waa ninkii u horeeyay ee jabaan ah ee sameeyay mushiin isagu qayb kasta oo kamida gacantiisa uu ku sameeyay, ninkaasi wuxuu yoolkaa ku gaadhay muddo dhan sideed iyo toban sano,

Jarmalka toban sano ayuu joogay isaga oo baranaya sida mushiinada loo sameeyo, kadib markii uu wadankiisa ku soo noqday si uu warshad dhamaystiran u sameeyo ayuu boqorkii Jabaan yidhi. Ninkaa ha la ii keeno si aan ula kulmo, laakiin Tokyo Osaahiro waa diiday oo wuxuu yidhi, wali ma mutaysan inaan boqorka la kulmo, waa inaan sameeyaa warshad soo saarta mushiinada marka hore , samayntii warshaduna waxay ku qaadatay sideed sano oo kale

Maalintii uu sameeyay mushiino fara badan oo warshadu soo saartay ayaa wuxuu yidhi maanta haddaba ha la ii geeyo boqorka, markaasaa waxaa mushiinadii la taxay daarad balaadhan oo ku tiilay guriga boqorka, halkaas oo loo sii diyaariyay si xaflada loogu qabto.

Toban mushiin ayaa mar kaliya la wada shiday, markaasaay dananeen, boqorkii baa hadlay oo yidhi:

Tani waa heestii ugu macaanayd ee waligay dhagahaygu maqlaan, waa mushiino jabaan lagu sameeyay, ilbaxnimadii yurub jabaan baan keenay, Jabaana yurub baan u rarnay.

Wuxuu yidhi Tokyo Osahira: maalintii xafladaasi dhacday ayaan gurigaygii tagay markaasaan seexday toban saacadood oo isku xigta, waana maalintii koowaad ee mudo sideed iyo toban sano ah aan seexdo toban saacadood oo isku xigta,

Dhalinyaroow inaguna maalin walba waxaan seexanaa toban saacadood iyo wax ka badan, waxaanan doonaynaa inaan durba caan noqono, oo durba madax noqono, oo durba xoolo helo,

Dariiqa guushu maaha mid sidaa u dhib yare e waqti iyo dadaal badan buu u baahan yahay ee dhalinyaroow sidaa u ogaada
Haddii kale oo sidaa si aan ahayn aad ku doontaanna idinka ayaa doortay dariiqii faqriga iyo dullinnimada ee sidaa ku ogaada.

## 23.IIMAAN DARRO ( HUNGURI WAYNI) SELFISHNESS

Qofka ama sharikaadka iimanka darrani waa qaar aan cid kale waxba u ogolayn ee kaligood uun wax isla raba , had iyo jeer waxay rabaan dheeraad, mana iimaan sadaan waxa iyagu leeyihiin oo kaliya iyo waxa ku filan
Waxaa jirta qiso arintan ka turjumaysa.
Waxaa jiray nin beeroole ah, waxaa loogu ballan qaaday inuu qaato dhulka uu socon karo ilaa inta ay qorraxdu ka dhacayso, laakiin waxaa shardi looga dhigay in ka hor inta aanay qorraxdu dhicin uu ku soo noqdo goobtii uu socodka ka bilaabay.
Ninkii wuxuu bilaabay orod dheer si uu u badsado dhulka uu helayo, wuxuu ordaba markii ay casar gaaban tahay ayuu is xasuustay in dhulka uu qaadannayo loo shardiyay inuu inta aanu gabalku dhicin ku soo noqdo goobtii uu socodka ka bilaabay, dib ayuu usoo noqday, wuxuu orod lahaa oo dhan buu isticmaallay, kadib markuu goobtii soo gaadhay ayuu dhacay oo wadnuhu istaagay halkiina ku dhintay.
Qisadani waxaan ka baranaynaa qof kasta oo Iimaan daranni in khaatumadiisu sidan oo kale ku danbaynayso wax hanti ahna aanu sidan ku helayn. Markaa haddii aan noqono qaar sidan oo kale u hunguri wayn oo iimaan la, waxaan doorannay dariiq

khaldan oo ama faqri inoo horseedayaa ama nafaheenaba halaagaya.

Waana inaad kala saartaa hammiga sarre iyo iimaan darrada. Hamiga sarre waa inaad meel wayn hiigsataa, laakiinse sifo sharci ah aad u martaa xaqiijinta hadafkaaga,

Hunguri waynidu waa inaad xataa waxa dadka kale haystaan isku daydaa inaad ku darsato, waa inaadan haddii cid ay lexejeclo idin dhexmarto aanad marnaba tanaasul la iman, haddii adiga wax lagaa qaadona aad dhimasho ka xigto, oo aad noqoto caabudu dirhum , iyo waa inaad kaliya ka fikirtaa uun sidii aad xoolo u helli lahayd xalaal ha noqoto ama xaraane.

## 24. WAX KAMA BARATID KHALADAADKAAGII HORE

Sida uu nabigu naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee yidhi:

«كل ابن آدم خطاء، وخير الخطّائين التوّابون

*(Bili,aadan dhamaantii waa gaf badane, waxaase ugu khayr badan kuwa gafkooda kasoo noqda ee ka toobad keena).*

Khalad kollay iyo kollay waad gali maadaama aad tahay bini'aadan, laakiin ma tahay mid gafkiisa ka soo noqda wax ka barta,

Gafku waa laba qaybood mid aad ku gafto xaqii ilaahay kugu lahaa sida wixii ilaahay ku amray oo aad la iman waydo amase wixii ilaahay kuu diiday oo aad la timaadid, kaasi waxaa la rabaa inaad

ILAAHAY uga toobad keento oo aad ilaahay u soo noqoto, wixii xumaan aad ku jirtay aad ka baxdaa oo aad joojisaa.

Ka kalena waa khaladka qofku galo marka uu shaqada ku jiro, taasi maaha mid ilaahay kugu ciqaabayo, laakiin waxaaba ciqaab ugu filan qofka in khaladkaa uu sameeyay natiijada ka dhalatay ay saamayn xun ku yeelato, sida adiga oo khasaare ku soo gaadho. Markaa khaladaadkaa shaqada waxaa muhiima inaad wax ka barato oo mustaqbalka aad martaa dariiq ka duwan kii hore ee aad martay, laakiinse haddii aad tahay mid khaladkiisa aan waxba ka baran oo ku celceliya uun waligaa horumar dhaqaale ma gaadhaysid, sidaana waxaad ku doortay dariiqii faqriga.

## 25. BALWAD BAAD LEEDAHAY.

Waxaad waqtigaaga qaaliga ah iyo hantidaada qaaliga ku lumisaa iibsiga balwada, sida qaadka sigaarka, khamriga, iwm

Markaad tahay mid ku mashquulsan helida balwadda iyo waqtiga uu isticmalayo sidee baad u doonaysaa inaad lacag ku hesho oo aad qani ku noqoto. Miyaanad adigu markaa faqriga dooran

Miyaanad dooran inaad qayrkaa hoos joogto oo aad wax waydiisato. Maalin kaliya ma iswaydiisay waxa ay qayrkaa kaaga horumareen? Jawaabtu waa maya, waayo haddii aad is wayddiin lahayd waxaad ka bixi lahayd dhibta ku haysta.

Mar haddii aad tahay mid balwaddo leh ogow inaad adigu doorotay dariiqa faqriga.

## 26. WAXAAD TAHAY MID WAQTIGIISA KU LUMIYA WAXAAN FAAIIDO LAHAYN.

Waxaad waqti badan ku lumisaa daawashada tvga, waxaad waqti badan ku lumisaa fadhi ku dirirka sida ka hadalka siyaasiyiinta, qabiillada, dadka, waxaad waqti dheer fadhidaa meelaha fagaarayaasha hadalka, waxaad muddo badan fadhidaa goobaha lagu qayilo, waxaad warwareegtaa suuqyada, waxaad waqti badan ku lumisaa adeegsiga internetka sida facebooka,

Markaad tahay mid sidaa u dhaqma miyaanad adigu ikhtiyaarkaaga faqiirtimo ku dooran.

Dadka qani ahi waqtigooda kuma lumiyaan maalaayacni, shaqada ayay aroorta todoba subaxnimo tagaan waxay ka soo rawaxaan habeenka tobanka habeenimo.

Waxaanad tidhaahdaa markaad ka sheekaynayso Alla muxuu ilaahay ninkaa xoolo siiyay

Haa Alle wuu siiyay oo haddii aanu Alle toofiiqda waafajin dadaal kaliya kuma heleen, laakiin isaguna awooddiisa oo dhan buu isticmaalay, dhib oo dhan buu dusha u riday, macmacaan iyo fadhi ku dirirna isma yaqaanaan. Markaa faraqaa ayaa idiin dhexeeya adiga iyo isaga.

Miyaanad ogayn in waqtigu noloshaada yahay, oo saacad kasta oo ku dhaaftaa ay tahay qayb noloshaada kamida oo ku dhaaftay, maxaad uga faaidaysan la'dahay oo wax aduunyaddaada iyo aakhiraddaada ku anfaca u qaban laadahay?. Maalinta qiyaamaha su,aalaha lagu waydiin doono ee aanad Alle hortiisa ka dhaqaaqi doonin waxaa kamida waqtigaagii waxaad ku

qabatay? . Miyaanay nasiib darro ahayn inay jawaabtaadu noqoto qaad baan u fadhiyay, facebuug baan istimaalayay, meelaha fadhi ku dirirka ayaan fadhiyay oo qabyaalad baan ka sheekaynayay.

Wallaahi waa nasiib darro, qaar badan oo dadkeena kamida ayaa jawaabtaa bixin doona ( waa haddii ay ka toobad keeni waayaan) ilaahay inagama dhigee , waayo waxaa laga hadashiin doonaa xubnihiisa, xubnuhuna been ma sheegi doonaan ee wixii aad samayn jirtay ayay sheegi doonaan.

Allaahu mustacaan, wallaahi waa nasiib darro.

Markaad waqtigaagii sidaa u lumisay, waxaad doortay dariiqii faqriga, dariiqa dayaca, iyo khasaaraha aduun iyo aakhiraba.

## 27.DADKA HORUMARKA SAMEEYAY AYAAD XAASIDDAA.

Waqtigaaga qaaliga ah waxaad ku lumisaa inaad ka hadasho oo aad wax ka sheegto dadka guulaystayaasha ah oo aad ceebo u raad raadisaa, halkii ay ahayd inaad wax ka barato, taasina waa sababta keentay inaad noqoto mid faqiira. Waligaa guul gaadhi maysid inta aad sidaa tahay, ilaa dhaqankan xun aad ka xorawdo. Maxaad dadka kale ugu hinaasaysaa? Ma waxaad moodday inay meesha maanta ay taagan yihiin ku gaadheen bilaash iyo dhib yarri, miyaad ogtahay dhibta ay u soo mareen, miyaad ogtahay halganka ay u soo galeen. Waxaa fiican in maanta laga bilaabo aad wax ka barato oo aad u noqoto arday, halkii aad awal xaasidka ku ahayd ee aad ceebahooda baadhbaadhi jirtay.

Dadka faqiirka ah in badan oo kamid ahi waxay cadho ka qaadaan Hantida ay haystaan kuwa Qaniga ahi, waxay moodaan in waxa iyaga faqiirka ka dhigay ay tahay in kuwa Qaniga ahi hantidoodii qaateen. Waxay odhanayaan: dadkaasi ayaa hantidii oo dhan wada qaatay waxba noomay reebin; Hadalkani waa hadal dhibane. Dictoor T Harv Eker oo ah mid kamida milloneerada maraykanka ayaa arintan tusaale cad u sheegaya Sida uu ku sheegay kitaabkiisa Secrets of mulitimiloner Wuxuu yidhi: markii aan faqiirka ahaa ee aan watay gaadhi ah nooca dabaqada hoose, bulshada wax dhib ah kalama kulmi jirin, dariiqana si fiican baan u mari jiray, laakiin markii aan Qani noqday ee aan qaatay Gaadhi kamida Gaadhiyada ugu qaalisan, waxaan dariiqa kala kulmaa dhibaato, dadku way ku aflagaadaynayaan. Maalin maalmaha kamida ayaan gaadhigayga meel kaga tagay, kadib waxaan ku soo noqday iyada oo dhalinyaro ay basket ku dulciyaarayaan gaadhigaygii, markii aan la hadlayna way I caayeen oo waxay igu yidhaahdeen ( YOU RICH BASTARD) baastar xun oo qani ah ayaa tahay.

## 28. WAXAAD TAHAY MID WARWAR IYO WALAAC BADAN.

Marka ay dhib kula soo gudboonnaato warwar baa ku dilla, adiga oo aan marnaba ka fikirayn xallinta dhibaatada ee murugo iyo ciil baad ciidan mooddaa.

Werwerku maskaxda wuxuu u diraa werwer taasina waxay keentaaa in maskaxdu aanay fikir fiican oo xal keena kuu soo dayn. Werwerku inta badan wuxuu sababaa inaad go'aano xun

xun qaadato. Haddii aad go,aan xun qaadatana waad guuldaraysanaysaa, horumarna ma gaadhi doontid.

Markaa haddii aad tahay mid Werwer iyo murugo had iyo jeer maciinsada adiga ayaa faqriga doortay.

## 29. DAD XUN BAAD SHAQAALE KA DHIGATAA.

Ganacsiyo badan waxaa khasaarahooda u sabab ah shaqaale xun oo uu aamminay ninkii shaqada lahaa. Waxaad aamintaa qofka hadalkiisa wanaagsan, qaab dhismeedkiisa, ehelnimadiisa, kadibna shaqadaada ayaad faraha uga qaadaa, kadibna sida abeeska ayuu kuu jaqaa. Marka aad dareento horumar la'aantana wuxuu kuu sheegaa sababo kale oo aan meesha oolin.

Rabbi uun baa boqolkiiba boqol la aamini karaa, laakiin inta ka kasoo hadhay aaminaad dhamaystiran lama siin karo, waa inaad mar walba digtooni ku jirtaa. Shaqadaadana nidaam fiican u samaysaa, dabagal joogta ahna aad yeelataa. Qof aad shaqaale ka dhiganaysana aad taariikh nololeedkiisii hore baadhaa, dadkii hore uu la shaqayn jiray waraysataa, marka uu shaqada soo galana aad dabagal joogta ah ku haysaa si aad u ogaato inuu yahay mid ku anfacaya iyo in kale.

Ogow dadka hadalkooda laguma xukumi karo, laakiin ficilkooda iyo dhaqankooda ayaa lagu xukumi karaa. Haku dagdagin inaad qofka marka hore xukun siiso ama xukunkaasi ha noqdo mid xun ama mid fiicane

Nabiguna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu yidhi:

إن الله لا ينظر إلى صوركم وأموالكم ولكن ينظر إلى قلوبكم وأعمالك....

(Ilaahay ma eego suuradiina, iyo xoolihiina laakiin wuxuu eegaa qalbigiina iyo camalkiina)

U fiirso xaddiiska qofka camalkiisa ayaa lagu xukumayaa maaha suuraddiisa.

Khibrada iyo waaya aragnimada waxaan ka barannay in dadka qaraabada ah iyo shaqadu ay isku yihiin sida biyaha iyo salliida had iyo jeer labadaasi si fiican iskuguma milmaan.

Nin kuu digay kuma dilin.

Haddii aad tahay mid shaqaalihiisa iska aamina ogow adiga ayaa faqiirtino doortaye.

## 30. NAFTAADA KUMA KALSOONID

Kalsooni la'aantaadu waxay turaanturo ku tahay guulgaadhistaada.

Marka aad naftaada kalsooni ku qabi waydo adiga ayaa dadka kale u dhiibay rasaasta si ay kuugu toogtaan.

Maanta lag bilaabo naftaada ku kalsoonaw, aammin inaad wax qabsan karto, aammin inaad guul gaadhi karto, aammin inaad qani noqon karto, aaammin inaad caalim noqon karto. Aammin

inaad wax kasta oo qof kula mid ahi qabtay adiguna aad qaban karto.

Ibraahim Linkon oo fashilmay boqollaal jeer oo dadka oo dhani yasi jireen haddana wuxuu noqday mid kamida madaxwaynayaashii maraykanka kuwii ugu qiimaha badnaa. Tusaale ka dhigo, inkasta oo dadku marka uu arrin ku guuldarraystaba ay yasi jireen, laakiin isagu marnaba isma dhiibin ee naftiisa ayuu kalsooni ku qabay inuu wax noqdo, ugu danbayntiina yoolkiisii iyo himilladdiisii wuu gaadhay.

## 31. WAXAAD LA NOOSHAHAY WIXII TAGAY .

Had iyo jeer waxaad ka fikirtaa wixii tagay, waxaad xasuusataa guuldarraddaadii hore, waxaad xasuusataa dadkii ku xumeeyay, waxaad xasuusataa dhaawacyadii kusoo gaadhay, waxaad xasuusataa dadkii ku dhacay. Waqtigaaga oo dhan waxaad ku mashquulsan tahay xasuusta wax tagay. Markaad tahay mid sidaa dhaqankiisu yahay marnaba suuragal maaha inaad horumar samayso oo aad qani noqoto.

Wixii hore wuu tagay wax tagayna tiigsimaad ma leh ee hore u soco, wixii hore xasuusteedu kaliya hakuu noqoto cashar aad wax ka baratay ugana faaiidaysato dhisidda mustaqbalkaaga.

Dadka qanniga ahi maaha qaar ku mashquulla wixii tagay, wixii tagay cashar bay ka bartaan, horena way u socdaan.

Dad badan waxaa ku keena xannuunada ay ka midka yihiin macaanka, dhiig karka, iyo xanuunka walaaca (stresska) waa

iyaga oo wax dhacay ka muruggooda. Muruggadu wixii tagayna soo celin mayso waxa joogana wax ka tari mayso, horumarkana way kuu diidi, waxaa taa kuu sii dheer inay caafimaadkaaga wax yeesho.

Markaa haddii aad tahay mid had iyo jeer wixii tagay uun ka murugooda ogow inaadan noqon Karin qof horumar dhaqaale samayn kara.

## 32. WAXAAD KU NOOSHAHAY YIDIDDIILO AAN CAMAL WADAN.

Waxaad tahay mid yidhaa waxaa saan qaban doonaa, waxaa saan fullin doonaa, laakiin ma tihid mid wixii uu yidhi ficil u baddala, kaliya waxaad tahay mid hadla oo hadla oo hadla, laakiin aan waligii wax qaban. Waxaad doonaysaa inaad beer goosato laakiin ma tihid mid qodaya oo ku tabcaya.

Ogow arimuhu way dhacaan waayo inaga ayaa sabab u ah dhicitaankooda, buug wuxuu buug ku noqday waxaa qalinka la dul dhigay buugga maskaxda wixii ku jirayna waa lagu qoray.

Haddii aad tahay mid markaa yididdiilo ku nool oo aan ficil la iman ogow inay ka mid tahay calaamad kamida calaammadaha keena dib u dhaca oo faqrigu ka mid yahay.

## 33. MAS'UULIYADDA MUSTAQBALKAAGA MA QAADID

### a. EE CID KALE AYAAD KA SUGTAA.

Dadka Qaniga ahi waa dad iyagu is wada oo mas'uulliyadda naftooda qaada oo aan cidna u daba fadhiisan dhisidda mustaqbalkooda; waalidkood uma daba fadhiistaan, walaalkood uma daba fadhiistaan, saaxiibkood uma daba fadhiistaan, dawladdooda uma daba fahiistaan, waa dad iyagu gaadhigga shookaanta u haya oo u wada dhinaca ay doonnayaan, laakiin dadka faqiirka ahi waa dad aamminsan in cid kale ay wax u qabato, in cid kale ay caawiso, cid kale wax barto, cid kale ganacsi u samayso, cid kale biilkeeda bixiso.

Dadka faqiirka ahi had iyo jeer waxay ciyaaraan doorka dhibbannaha ( they play the role of the victims).

Waxaa u caada ah saddex arimood;

Canaan ( blame).

Waxay ku takhasuseen canaanta dadka kale, waxay farta ku fiiqaan oo ay eedeeyaan dad kale, duruufo kale iyo arin kasta oo iyaga ka baxsan, waxay illoobaan in iyagu ay naftooda mas'uul ka yihiin.

Waxay eedeeyaan dhaqaalaha dalka , waxay eedeeyaan dawlada, waxay eedeeyaan suuqa, waxay eedeeyaan ganacsiga, waxay eedeeyaan qofka ay u shaqaynayaan ( employer), waxay eedeeyaan shaqaalahooda (Employees), waxay eedeeyaan maamulkooda, waxay eedeeyaan macmiilkooda, waxay eedeeyaan xaaskooda, waxay eedeeyan waalidkood, ugu danbayna waxay eedeeyaa RABBIGII abuuray, ( ALLE iima

qorin,Alle ima siin, ILAAHAY baa iigu talaggalay). Waxay illoobaan oo aannay marnaba eedda ku soo darin naftooda.

Dr la yidhaahdo Rooni ayaa wuxuu ka sheekaynayaa qisaddiisa horumarka iyo halka uu isbadalka noloshiisu ka billaabmay wuxuu yidhi: Aniga oo muddo lix sano ah hore u soo shaqeeyay ayuu I waydiiyay Tababarre nololeedkaygii maxaa lacag ah oo kaydka kuugu jira?

Waxaan ku jawaabay buu yidhi: wax lacag ah oo kayd ah ma haysto.

Wuxuu I wayiiyay buu yidhi: oo maxaa kugu dhacay lix sano waa waqti badane?

Waxaan ku jawaabay buu yidhi: oo aan tiriyay in arimo badan oo ay kamid yihiin shaqada, dhaqaalaha, shirkada aan u shaqeeyo, kuwaas ayaan eeda saaray buu yidhi.

Wuxuu yidhi: Ninkii tabbabare nololeedkii baa sidaa ii eegay markaasuu yidhi; waxaad ii tirisay arimo badan oo kuu diidday inaad wax kaydsato, waxaanad illawday tii ugu muhiimsannayd.

Waxaan ku idhi buu yidhi: oo maxay tahay taasi?

Wuxuu iigu jawaabay buu yidhi: waa Adiga ( Naftaada ayaad illawday).

Wuxuu yidhi Jom Rin, wixii maalintaa ka danbeeyay wax ii qabsoomi waayay cid kale kuma canaanan, horumarka maalintaa ii bilaabmayna ilaa maanta waan ku socdaa.

Akhristaha qiimaha lahoow marka aan dib ugu noqono diinteena suubban waxay ina bartay inaan mas'uuliyadda nafaheena qaadno oo wixii gaabis ah ee xaggeena ka yimid aynaan cid kale

ku canaannan. Waxaa tusaale inoogu filan dagaalkii Uxud markii Saxaabada la jabiyay ayaa waxay qaar kamid ahi yidhaahdeen Oo jabka intan le'eg muxuu noogu dhacay miyaannaan muslimiin ahayn, kuwaasina miyaannay gaalo ahayn. ILAAHAY xumaan oo dhan ka maydhane wuxuu si uu khaladkaa u saxo ku soo dejiyay quraan la akhriyo ilaa qiyaamaha.

Ilaahay wuxuu yidhi:

**أولما أصابتكم مصيبة قد أصبتم مثليها قلتم أنى هذا قل هو من عند أنفسكم إن الله على كل شيء قدير**

( ***markii ay musiibo idin haleeshay idinkuna aad taa laban laabkeed gaalada u gaysateen daggaalkii Badar ayaa waxaad leedihiin maxay dhibtani noogu dhacday, waxaad ku tidhaa Nabi maxamedoow dhibtani xaggiina ayay ka timid***)

Dhibtana waad maqasheen in kooxdii Nabigu dhiggay buurta ee uu yidhi haka soo dhaadhicina xataa haddii aad aragtaan haadda oo na cunaysa, kadib markii ay arkeen gaalladdii oo jabtay oo qaniimmadii la urursanayo ayay markiiba dagdag buurta uga soo dageen amarkii nabigana sidaa ku khilaafeen, khilaafkaasina sabab u noqday in jabka intaa le,egi yimaado.

2- Justifying ( Cuddur daar ama marmarsiiyo )

Doorka kale ee dadka faqiirka ahi ay ciyaaraan waa inay had iyo jeer dib u dhacooda wax ku sababeeyaan. Tusaale ahaan waxay odhanayaan: lacagtu muhiim maaha ( money is not important)

Bal su,aal kaliya ayaan waydiinaynaa qofka sidan u hadlaya: waxaan leenahay bal ka waran haddii aad bilaa lacag tahay haweenaydaada, saaxiibbaddaa, walaalahaa, iyo dadka kaleba side bay kuu arkayaan, ma ku ixtiraamayaan, ma ku jeclaanayaan? Jawaabta qofka sidaa leh ayaan uga tagaynaa.

Xaqiiqadu waxay tahay qof odhanaya lacagtu muhiim maaha waa qof aan lacag haysan oo lacag la'aantiisa ku sabababayna inaanay muhiim ahayn.

Haddii aan lacag jirin lama dhiseen guryo, magaalooyin, masaajido, madarasaddo, lama dhaqdeen reero lamana koriyeen ubad, Ilaahayna quraankiisa wuu ku ammaanay ciddii lacag bixisa oo marka jihaadka laga hadlaayo xataa nafta waa laga horeysiiyay oo ilaahay wuxuu yidhi:

( وجاهدوا بأموالكم وأنفسكم في سبيل الله ذلكم خير لكم إن كنتم تعلمون_ )

( *ku jihaada maalkiina iyo naftiinaba*).

Waxaa kale oo ay odhanayaan lacag aan ganacsi ku billaabo ma haysto, waxaan leennahay dadka dunidda maanta ugu lacag badani markii ay wax bilaabayeen iyaguba lacag may haysan, cidina lacag ma siin, ee waxay ka bilaabeen eber ama eber wax ka hooseeya ( zero or mines).

Waxay odhanayaan, curyaan baan ahay, oo miyaanad akhriyin taariikhda, imisa curyaana imisa indhala, imisa dhagala, imisa lugala, ayaa horumar aad u wayn gaadhay?

Waxay odhanayaan waalidkay ayaan si fiican ii soo tarbiyadayn

Waxaan leenahay oo imisa qof ayaan tarbiyad fiican iyo xanaano fiican hore u helin oo maanta haddana dunida magac fiican ku leh.

Cudurdaar la aqbali karo meesha ma yaalo mar haddii shaygii ugu qaalisanaa ee ilaahay kugu karaameeyay aad haysato kaasina waa caqliga iyo caafimaadka.

Miyaan la gaadhin waqtigii aad joojin lahayd cudurddaarka ee aad ciidda dushaada saaran iska rogi lahayd, miyaan la gaadhin waqtigii aad mustaqbalkaaga dhisi lahayd, miyaan la gaadhin waqtigii aad dunida wax ka noqon lahayd.

Haddii aad tahay mid kamida dadkaa wax kasta oo noloshooda ka xumaada cudurdaarka u raadinaya, ogow inaad adigu dooratay dariiqa faqriga.

## 3- Cabasho ( complaining).

Cabasho iyo calaacalku waa arrin aad u xun oo sida aan ognahay waa inaad dhib jirta oo ku haysata aad dadka uga sheekayso adiga oo cabasho ahaan u gudbinaya, adiga oo og cidda aad u sheeganaysaa cabashadaa inaanay wax badan kaala qaban Karin. haddii aad cabanayso ILAAHAY u cabo oo dhibtaada u sheego oo waydiiso inuu kaa faydo, laakiin bili, aadam aad u cabataa waxba kaaga qaban maayaan

Nin gabayaa ah ayaa yidhi isaga oo wiilkiisa la hadlaya

لا تسالن بني آدم حاجة وسل الذي أبوابه لا تحجب
الله يغضب إن تركت سؤاله وبني آدم حين يسال يغضب

***( wiilkaygiiyoow, bili, aadan waxba ha waydiisan, Allihii aan albaabadiisa la xidhayn waydiiso, bili'aadanka marka aad wax waydiiso wuu cadhoodaa, Rabbina hadii aad wax waydiisan waydo ayuu kuu cadhoodaa)***

Waxaa kale oo aan odhan karnaa cabashadu waa arrin khatarteeda leh, maxaa yeelay shayga marka aad awoodda saarto ee aad ku celceliso waxaa suuragal ah in wixii xumaa ee aad mar walba aad sheegaysay ay kugu dhacaan. Waxaa jira qaanuun la yidhaahdo ( Law of Attraction) kaas oo sheegaya : jacaylku jacayl buu soo jiitaa, nacaybku nacayb buu soo jiitaa, markaa cabashadaasi waxay soo jiidanaysaa xaaladdaa xun ee aad ka cabannayso oo waxaad arki iyada oo oo dhab ah oo dhacday.

Sidaa daraadeed diinteena suubban waxay diidday in hadal xun la sheego iyo in riyo xun la fasiro, waxaa la diiddayaa waxaa xun ee la sheegayaa inay dhab ahaan u dhacaan.

Waxaan anigu khibrad ahaan u arkay dadka masaajiddada ka kaca ee dadka u cawda ee dhibaatooyinka tiriya, waxaad arki qofkii oo marba marka ka danbaysa ka sii daraya oo xaaladdiisu sii xumaanayso, markii uu qofkaasi cabashada billaabay wuxuu ahaa qof aanay wax dhib ahi wajigiisa ka muuqan oo aad u quruxsan, balse marka uu muddo cabashadaa wado waxaad arki in xaaladiisu ka sii darto oo aad arki isaga oo aad u foolxun oo aanay ishuba kuu qaban karan, maxaa yeelay wixii uu ku celcelinnayay ayaa ku dhacay.

Diktoorka magaciisa lay idhaahdo T harv Eker ayaa wuxuu yidhi:

***( waxaan ku talinnayaa inaad ka fogaato dadka cabashada badan, haddii kale waxay ku qabadsiinayaan xanuunkooda).***

Diktoorku isaga oo hadalkiisa sii wada wuxuu yidhi: ***( Dad badan baa jecel inay dadka cabanaya cabashadooda dhagaystaan. Sababtu waa maxay? Waa mid fudud . waxay doonayaan in iyagana markooda la dhagaysto)***

Almuhim haddii aad tahay mid noocan ah oo ku sifaysan sifooyinka aan kor ku soo sheegnay, miyaanad adigu xoriyaddaada faqiirtinada ku dooran?.

## 34.YOOL CAD MA LIHID

Waad iska nooshahay oo ma taqaannid waxaad u nooshahay, ma taqaannid meel aad u socoto,

Ma taqaannid waxa aad doonnayso inaad adduunyada ka noqoto, waad cuntaa waad cabtaa, waad seexataa, waad soo toostaa, waad sheekaysaa, caruurta masaariifteeda ayaad raadisaa oo haddii mishaharku kugu fillaan waayo waad u shaxaad tagtaa, noloshaadu sidaa ayay ku dhamaataa.

Qofku safar yar oo gaaban marka uu galayo waad garan kartaa sida uu u diyaargaroobo ee wax kasta oo safarkiisa ku lugleh uu diyaarsado, waxaase nasiib darro ah safarka nolosha ee qaadanaya lixdan sano, todobaatan sano sababta uu qofku ugu diyaargaroobi la, yahay,

Noloshan waxaa guulaysta oo kaliya kuwa leh yoolka cad,

Garanaya waxay u noolyihiin, garanaya meesha ay u socdaan.

Sababaha inta badan keena in qofku aanu waqtigiisa ka faaiidaysan amase keena inaanu helin xamaasad uu wax ku qabto, waa yool la'aanta. Marka qofku Yool cad leeyahayse oo meel uu calaammadaystay uu u socdo wuxuu helayaa dhaqaajiye iyo xammaasad oo awooddiisa oo dhan buu isticmaalayaa, waqtigiisana ma lumiyee wuu ka faaiidaystaa.

Kasoo qaad qofka orodyahanka ee tartanka ku jira, suuragal miyay tahay inuu iska fadhiisto, suuragal miyay tahay in awooddiisa uu badh la hadho, qofka haddaba hadafka lihi waa sidoo kale.

Akhristaha sharafta lahoow adigaan kula hadlayaaye, naftaada qiimee oo is waydii muxuu yahay noloshan hadafka aad ka leedahay?

Ma waxaad leedahay Yool cilmi?

Ma waxaad leedahay yool siyaasadeed?

Ma waxaad leedahay yool dhaqaale?

Ma waxaad leedahay yool kale oo intaa midna aan ahayn?

Haddii jawaabtaadu tahay mid Togan ( positive) qodobkan waad ku baastay,

Waxaa kuu hadhay oo kaliya inaad dejiso istiraatijiyadii aad ku gaadhi lahayd meeshaa aad u socoto.

Su'aasha labaad ee aan ku waydiinayaa waxay tahay ma leedahay istiraatijiyad qoran oo cad oo ah dariiqii aad u mari lahayd meeshaa aad u socoto ma kuu caddahay ?

Hadii jawaabtu tahay maya?

Waxaan ku leeyahay Yoolkaa quruxda badan ee aad dejisay waxba ka suuroobi maayaan ee wuxuu iska noqonayaa yididiilo madhan ee sidaa u ogow.

Su'aasha u danbaysa ee aan ku waydiinayaana waxay tahay, Istiraatijiyadii aad dejisay ee ahayd dariiqii (work plankii) aad ku gaadhi lahayd Yoolkaaga ma dabaqdaa maalin walba, asbuuc walba, bil walba, saddexdii biloodba mar, sanadkii iwm.

Haddii ay jawaabtaadu tahay: haa waxaan ku leeyahay hambalyo, ilaahay haku barakeeyee ku soco, ilaahayna talada saaro una adkayso dhibta, yaanay ku niyad jabin caqabadaha kaa hor imanyaa, ha is dhiibin, haddii albaab kaa xidhmo mid kale garaac, sidaa ku soco

Haddiise jawaabtaadu tahay Maya ogow in Istiraatijiyad aan camal loo baddalin oo warqad iskaga qorani wax horumar ah keeni doonin.

Qodobka u danbeeya ee aan ku waydiinayaa wuxuu yahay ma tahay qof kolba shaqadii uu qabtay dib u qiimeeya, oo tusaale ahaan asbuuc walba shaqada uu qabtay is waydiiya, shaqadii ii qorshaysnayd maxaa ka hirgalay , maxaase aan ka hirgalin, oo maxayse u hirgali waayeen.? Ma tahay qof sidaa wax u qiimeeya, mise waxaa tahay qof iska socda oo iska wada shaqada?

Haddii aad tahay qof qiimayn joogta ah sameeya waxaan ku leeyahay hambalyo, ilaahay haku barakeeyo hana kaa aqbalo camalkaaga ee sidaa ku wad.

Haddiise ay jawaabtaadu tahay: maya ogow in wax kaa qaldan yihiin oo waqtigii aad ugu talagashay in hadafkaaga aad xaqiijiso

aanad ku gaadhayn, maxaa yeelay waxaa jira khalado badan oo dib kuu dhigaya, maadaama aanad qiimayn joogto ah samayn.
Hadal iyo murti haddii aanad ahayn qof sidaa u shaqeeya oo noloshiisu sidaa ku socoto, oo haddana aad tahay mid ka cabanaya faqri, ogow in adigu aad tahay mid dariiqa faqriga xoriyadiisa ku doortay.

## 35.BALLANTA MA OOFISID ( waad ballan daran tahay)

Had iyo jeer ballanta dib baad uga dhacdaa, had iyo jeer wixii aad tidhaahdo waqtigaa ayaan ku dhamaynayaa dib ayaad uga dhacdaa, waraaqaha waqtigooda kagama jawaabtid.
Wixii aad ballan ku qaado inaad samaynayso ma samaysid.
Marka aad Ballan darradaa caado ka dhigato, dadkuna sidaa kugu bartaan, cid kula tacaamusha ma helaysid, dadku way isku kaa sheegayaan, taasina waxay keenaysaa inaad faaiidooyin badan oo aad heli lahayd sidaa ku waydo
Diinteena suubban waxay ballandarada ku tilmaantay inay tahay sifo kamida sifooyinka munaafiqiinta.
Soomaaliduna waxay tidhaa: Ballan darro waa diin darro.
Hadii markaa aad tahay mid Bilaa ballan ah sidee baad ku doonaysaa inaad qani ku noqoto oo aad horumar ku samayso
Miyaanad markaa adigu xoriyadaaa ku dooran dariiqa faqriga

## 36. AMMAANO IYO XIRFAD MIDNA MA LIHID

Labadan qodob waxay shardi muhiima u yihiin horumarka, iyo korida dhaqaalaha, hadii ay tahay mid shaqsi iyo mid guudba

Ammaanadu waa inaad xifddido wax kasta oo laggugu aammino ha ahaado xoolo amase ha ahaato sir,e

Nabi Muuse wuxuu shaqada ku helay waxay ahayd Ammaano iyo Xirfad.

قالت إحداهما يا أبت استأجره إن خير من استأجرت القوي الأمين

Gabadhii ina shucayb iyada oo Abaheed la hadlaysa waxay tidhi sida ilaahay inooga qisooday: (( *Aabboow shaqo sii, cid aad shaqo siiso waa kii ugu khayr badnaa oo waa mid Awood leh* ( xirfad) *waana mid aammina)).*

Waxay culumadu yidhaahdeen: waxay ku ogaatay inuu awood badan leeyahay markii ceelka uu uga waraabiyay, inuu aamin yahayna waxay ku ogaatay markii ay is raaceen oo iyaga oo cidla wada socda uu ammaan siiyay oo waliba sida la sheegay uu yidhi: adigu I daba soco oo kolba meesha aan marayo uun ii tilmaan, wuxuuna sidaa u yeelay waa inuu ka fogaado xumaan inuu ku dhaco.

Nabi Yuusufna wuxuu shaqada ku helay wuxuu ahaa aqoon xiradeed iyo ammaano. Sida ilaahay quraankiisa ku sheegay.

.قال اجعلني على خزائن الأرض إني حفيظ عليم

**Isaga oo la hadlaya boqorka ayuu ku yidhi:**

*( iga dhig inaan noqdo khasnad haye, waxaan ahay mid xifddinaya oo aqoonna u lehe*)).

Nabi Maxamedna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu shaqada ku helay Ammaano iyo run, markii khadiija Bintu khuwaylad ay shaqada siisay nabinnimmadda ka hor, waqtigaas oo lagu magacaabi jiray Saadiqul amiin ( kii run lowga ahaa ee aaminka ahaa).

Nin boqor ah baa doonayay inuu ogaado ciddii isaga baddali lahayd, maadaama isagu waynaaday inuu dhintana laga yaabo, wuxuu dejiyay qorshihii uu qofkii isaga baddali lahaa ku dooran lahaa, ee dadka ugala soo dhex bixi lahaa, wuxuu soo qaaday Abuur geed ( midho geed) .

Wuxuu iskugu yeedhay dadkii , wuxuuna u qaybiyay Abuurkii, wuxuuna ka dalbadday in mid kasta oo kamida uu soo beero, kadibna marka uu geedku soo baxo ee uu abaqaal gaadho dib loogu soo celiyo, dadkii mid walba wuu qaatay oo reerkiisii buu la tagay, wuuna beeray, dadkii waxay ogaadeen in abuurka boqorku u dhiibay uu yahay mid dhintay, markaa waa inay baddalaan oo mid kale ku baddalaan, sidii bay yeeleen wayna baddaleen, geedihii oo si fiican u baxay bay boqorkii u keeneen, mid kamida dadkii ayaa isagu abuurkii isaga oo wada u keenay oo aan wax geeda keenin, laakiinse markuu arkay in dadkii oo dhan geedo qurux badan keeneen isaguna uuna waxba sidin aad buu uga xumaaday, boqorkii baa waydiiyay sababta uu sida dadka kaleba u keeneen geedo isaguna geedkiisii u keeni waayay? Wuxuu yidhi boqoroow Abuurka aad noo dhiibtay wuxuu ahaa mid dhintay, inaan mid kale kuu keenana waxaan u arkay khiyaamo iyo ammaano darro.

Boqorkii dadkii ayuu la hadlay una khudbadeeyay, wuxuuna u sheegay in dhamaantood ay khaayimiin yihiin marka laga reebo ninkaa mooyee, ninkaasina uu noqday kii isaga baddali lahaa, ee mas'uuliyada umaddan qaadi lahaa, wuxuuna u sheegay in Abuurka uu u dhiibay uu ahaa mid dhintay.

Maanta haddaba marka aan eegno umaddeena iyo dhaqankooda waxaad arkaysaa in labadaa arimoodba aad ugu yar yihiin.

Maanta cid la aammino oo inta shaqo loo dhiibo aad kaga gam,i kartaa way yartahay, ammaanadii baa yaraatay.

Qofkii oo aad la yaabto shaqadiisa iyo kartidiisa ayuun baa si kadis ah waxaa kuugu soo baxaya arrin aanad waliggaaba filayn.

Tusaalayaasha waaqica ka jira tiro iyo cadad malaha.

Hadaba maxaa loo yidhaahdaa wadanka shaqo la,aan baa ka jirta? .

Anigu ma, aamminsani in shaqo la,aani jirto ee waxaan aaminsanahay in cid Ammaano leh oo shaqaysa la la'yahay.

Nin sheikh ayaa maalin ii waramay oo aan ka sheekaysannay arrintan ammaanada darrada jirta, wuxuu ii sheegay qiyaastii toban shaqo inuu sameeyay, tobankiiba dadkii uu u dhiibay inay baabi'iyeen. Wuxuu yidhi imika shaqada aniga ayaa faraha ku haysta oo cidna uma dhiibo, wayna ii fiican tahay.

Ammaano darradu waxay halis u sii tahay tukaanada yar yar ee tafaariiqda iibiya ee aanay suuragal ka ahayn in wax walba la qoro oo la xisaabiyo, laakiin sharikaadka jumlada iibiya, waxay samaysan karaan nidaam xisaabeed fiican oo ay ku ogaan karaan

wixii soo galay iyo wixii baxay, dhawrkii biloodba mar ayaa la tirin karaa alaabta, halkaana waa lagu ogaan karaa in wax khaldan yihiin iyo in kale.

Haddii aan usoo noqdo qodobka labaad ee Xirfada, waa muhiim oo iyada la'aanteed shaqadaada kama adkaan kartid, mar kasta oo shaqadaada aad xirfad fiican u leedahayna, waxaa kor u kacaya faaiidada aad helayso, mar kasta oo xirfaddaadu hoosaysana waxaa hoos u dhacaya faaiidada aad helayso.

Tusaale haddii aan soo qaadano dadka wax iibiya ee xirfada heerka sare ah u leh iibka ( sales) waxay helaan faaiido aad uga badan marka labarbardhigo kuwa kale ee aan xirfadaas lahayn, Dhakhaatiirta, Garyaqaanada ee ay xirfadoodu aadka u sarayso waxay faaiidaan lacag aad uga badan kuwa xirfadoodu hoosayso.

Haddii haddaba adiga xirfadda aad shaqadaada u leedahay hoosayso oo aanad haddana diyaar u ahayn inaad horumariso, oo aad wax barato waxaa hubaala inaad heli doonto faaiido aad u hoosaysa, taasina ay ku dhaxalsiin doonto faqri iyo inaad ku ekaato la dagaalanka quutal daruuriga.

Dalkeena markaan dib ugu soo noqono, dhibaatada dhaqaale ee ina haysata marka laga yimaado ammaana darrada, waxaa soo raaca xirfada dadkeena oo aad u hoosaysa, waxaad ka dareemi kartaa, dadka ku shaqaysta farsamada gacanta marka aad wax uga baahato laba arimoodba ayaad kala kulmaysaa; iyaga oo waqtigii loogu talagay aan ku dhamaynayn iyo iyaga wax fiican oo tayo leh aan samaynayn.

Haddii maanta aad u baahato inaad warshad samayso, waxaad ku khasbantahay inaad dalka dibadiisa shaqaale uga raadsato, taasina waxay ku kalifaysaa kharash badan.

Waxaan halkan kaaga Qisoonayaa arin Anaga nagu dhacday oo ku saabsan xirfad la,aanta dalkeena taala.

Waa sanadkii 2008dii, waxaan damacnay inaan samaynno warshad wayn oo soo saarta qalabka furniuerka, ( qalabka guryaha iyo xafiisyada), waxaanan soo iibsannay qalab aad u tiro badan oo ah kuwa lagu sameeyo furniutrka, markii aan dalka gudihiisa ka waynay cid nooga shaqaysa ayaa waxaan hindiya u doonannay shaqaale, saddex hindiya ayaan soo kaxaysannay, Hargaysa ayay ka soo degeen, habeenkii hotel bay seexdeen, markii aroortii waagii baryay ee aan qureecsiinnay ayaan u ambabaxnay dhinacaa iyo Borama oo warashadu ku taalay, markii aan dhaafnay magaalada Dila oo waqtigaa laamigu ku dhammaan jiray (gu,I jiray) ayay nimankii hindidii yaabeen, oo ay na waydiiyeen xageen u soconaa, Booramase xagay ku taalaa? Af ingiriisiga si fiican umay aqoon la ismana fahmi karayn, inta badan faraha ayaan ka wada hadlaynay, markii aan waddadii rafka ahayd cagta sii saarnnay ayay aad u sii shikiyeen, mise waxay is yidhaahdeen: maantaa la idiin yaabaaye waa la idin afduubay, kolba su,aal bay na waydiiyaan Boorama mee? Farta ayaan u godnaa oo waxaan nidhaa way dhaw dahay, laakiinse may rumaysan hadalkayagii ee waxay u qaateen in la afduubay, waayo waxay is waydiiyeen maxay tahay magaalada la leeyahay warshad baa taala ee haddana dariiqeedu sidan u xun yahay,

markii danbe waxaa dhacday arrin la yaableh, markii aan magaalada u jirtno qiyaastii todoba kiiloo mitir oo aan soconno meel rafa oo aad u darran oo gaadhiguna xawaare aad u hooseeya ku socda ayay nimankii hindida ahaa albaabbada boobeen oo ay gaadhiga ka dageen, oo ay gadaal u yaaceen, oo dariiqii aan ka nimid dib u qaadeen, gaadhigii baan joojinnay, waan ka daba yaacnay, ilaa aan aan gaadhnay, waxaa ila socday laba wiil oo kale, waxaan daba orodnaba oo iyaguna na hor yaacaanba ugu danbayntii waan gaadhnay oo aan qabannay, laakiin ma rag waawayn baad qaadi karaysaa, dhulka ayay is dhigeen iyaga oo ooyaya oo ashahaadanaya, waxay ahaayeen muslimiin, oo midba mid kale ku leeyahay ashahaado waa la inna laynayaaye, wax alla waxaan samayno ayaan garan waynay, annaga oo sidaa ula dhib qabna, ayaa waxaa meesha soo maray gaadhiga booliska oo uu la socdo taliyihii Borama ee waqtigaa oo la odhan jiray muuse kaadhiin, way joogsadeen arintii baan u sheegnay, waxay isku dayeen inay na caawiyaan, laakiin waxba way ka maqli waayeen, maalintii oo dhan kolba siday nooga ordayeen ee aan annaguna u daba yaacaynnay ayaan markii danbe waxaan isla fuulay buur dheer, buurtaas ayaaba khayr noo noqotay oo markaan buurtii fuulay ayaan magaaladii sheeda ka aragnay, markaasaan tusnay, way arkeen magaaladii markaasay ogaadeen in meesha magaalo ku taalo, waxaan ku sasabnay inay caawa seexdaan boorama, barrina ay Hargaysa ku soo noqdaan. Way naga aqbaleen iyaga oo walli shaki qaba, magaaladii baan gallay, waxaan toos u gaynay Hotelka lagu magacaabo Rays oo ah

hotelka ugu casrisan magaalada, cunto fiicana waan siinay, kadibna waxaan usoo kaxaynay goobtii ay warshadu ku taalay, aad bay ula yaabeen nakhas wayn baa kasoo baxay , wayna farxeen,( Alxamdulilah ) waxaad moodaa rag dil ka badbaaday oo kale, kadib habeenkiina waxaan u kaxaynay gurigii aan ugu tala galay, halkaasoo oo ay habeenkii seexdeen, aroortii markii waagii baryayay ayaan ku soo kallahnay oo aan ku nidhi: ina mariya Hargaysa aan idinku celinee. Waxay yidhaahdeen No, No, borama is good oo macnaheedu tahay maya, maya boorama way fiican tahay.

Nimankaa tiradoodu waxay ahayd sadex nin oo kharashka ay nagu fadhiyaan bishii ay gaadhaysay kun iyo shan bqol oo dollar, bal ka waran dadka wadanka haddii ay khirbadaa lahaan lahaayeen waxay qaadan lahaayeen lacag intaa ka hoosaysa, abaalna way ku qabi lahaayeen, anagana kharashku wuu naga yaraan lahaa.

Arrintani markii ay dhacday ayaa waxaan ku qorray mid kamida websiteyada, kadibna waxaan ku warhelay in websiteba website sidii uu uga xigannayay, ay dhamaan websiteyadii wada qoreen oo haddana jaraaidadii qoreen.

Waxaana arrintaa ka dhalatay in lagu baraarugo in jidkaa la dhiso oo markii danbe ay Ree boorama samaysteen shirkad jidadka dhista oo loo yaqaano ASARDA oo uu madax ka ahaa professor Xasan Cali oo imika ah Maareeyaha guud ee wadooyinka Somaliland. Jidkiina sidaa lagu dhamaystiray xukuumada Axmed Maxamuud Siilaanyona qayb muhiima ka qaadatay, oo maanta jidkii laga dhigay mid laami ah oo halkii markii hore Dila iyo

borama saacad loo socon jiray maanta loo soconayo wax ka yar labaatan daqiiqo. Arrintaasi tusaale fiican u noqotay in dadku ay wax qabsan karaan, kadibna la bilaabay jidad badan sida jidka dawga cad, jidka sallaxlay, jidka baligubadle, jidka burco ilaa ceerigaabo, iyo kuwo kale, oo dhamaan shacabku qaybta ugu wayn ka qaateen, ilaa imikana ay in badan oo kamid ahi ay socdaan.

Waxaa laga yaabaa inaan mawduuca ka baxay, laakiin waxaan ku keenay xirfad la'aanta wadanka ka jirta iyo in marka aad u baahato inaad mashruuc maalgashato aad shaqaalaha dibada kasoo kaxaysannayso. Maanta dhibaatada ay innagu hayso xirfad la'aantu maaha mid la soo koobi karo, marka aad u fiirsado majaal kasta oo xirfad u baahan, ha noqdo mid iib, ha noqdo mid dhisme, iyada dhismaha warkeedaba daa, waxaad arkaysaa guri yar oo lacagta ku baxaysaa ay gaadhayso konton kun oo dollar, waxaana taa keenayaana waa dadka shaqada haya oo aan xirfad badan u lahayn, oo waliba qabiil iyo qaraaba kiil shaqo ku doonaya, oo marka la yidhaahdo gurigaa nin ree Hebel ah ayaa dhisaya ayaa markaa kuwii reerkaa ahaa ay fiilo usoo galaan oo ay kuwa kale ka riixdaan. Kadibna gurigaas iska yar yaraystaan oo waqti dheer haystaan, mar kasta oo waqtigu dheeraadana kharashka ayaa bata, gurigaa haddii ay dhisi lahaayeen dad xirfad leh, waxaa laga yaabi lahaa lacagtaa badhkeed inuu ku kici lahaa, tayadiisuna ka fiicnaan lahayd sida uu imika yahay.

Maanta waxaa wadanka ka jira jaamacado aad u tiro badan oo magaalo kasta laga furay, laakiin nasiib daro maanta ma arkaysid

jaamacad farsamada gacanta lagu barto oo wadanka ka jirta, dadkuna maanta baahida ugu wayn waxay u qabaan waa xirfad.

Taariikhdu markii ay ahayd 19/9/20015 ayaa waxaa lagu Qabtay Hoteel guuleed ee magaalada Hargaysa Carwo jaamacada Somaliland oo dhan ay ka soo qayb galeen oo loogu tala galay in jaamacad walba ay ku soo bandhigto wax barashadeeda, waxaa wax lala yaabo ah in tirada jaamacada kasoo qayb galay oo Somaliland oo kaliya ahaa ay gaadhayeen 24 jaamacadood.

Dalku wuxuu u baahan yahay tiro jaamacado ah oo tayo leh, badalka jaamacadaha kalena waxaa fiican in lagu baddalo Machadyo farsamada gacanta lagu barto.

Ardayda ka soo qalin jabisa jaamacadahaas tirada badan marka ay suuqa soo galaan, maxaa kaga soo horeeya, muxuuse xirfad uu ku shaqo tago soo bartay, taasi waa ta keentay in dhalin yarada marka ay shaqo la'aantaasi ku dhacdo ay niyad jabaan kadibna Tahriibaan oo ay badda isku guraan.

Waxaa kale oo fahmi la'yahay sababta dadka jaamacada furayaa ay iskugu dayanayaan ee jaamacado wax kaliya uun lagu barannayo ay iskaga wada ag furayaan, ee wali loo la'yahay dad ku fikira in la furo iskuulo ama machadyo lagu barto farsmada gacanta.

Haddii machadyaddaa la helo qofka maalgashadaana faaiido ayuu ka heli karaa, dadkana wuxuu bari karaa xirfad ay ku shaqaystaan, wax soo saarka wadankana kor bay u qaadi doontaa, shaqo la'aantana way dhimi doontaa.

Dalka maleeshiya oo ah dal maanta horumaray, horumarkiisa waxaa u sabab ah iyaga oo awoodda saaray qaybta xirfada .

Dalka maleeshiya oo uu hogaaminayo Mahaatiir maxamed waxay sameeyeen Machadyo loogu tala galay farsamada gacanta oo ardayda iskuulada sare ka baxdaa ay galaan, si loogu diyaariyo inay shaqada suuqa taala u qaban karaan. Machadkaasi wuxuu ku yaala gobol kasta oo Maleeshiya ah. Waxayna arrintani kamid tahay arimaha ugu muhiimsansan ee dhaqaalaha dalka Maleeshiya kor u qaaday.

Dadka mas'uuliyiinta ah waxaa laga rabaa inay noqdaan qaar hammi umadeed sida, oo u damqada dadkooda, kana fikira sidii ay u horumarin lahaayeen ummada ay mas'uulka ka yihiin oo laga waantoobo fikirka liita, hanka hoose, iyo danaysiga gaarka ah.

Mas'uuliyiinta waxaan kula talinayaa inay eegaan aduunyada kale siday u horumartay oo ay khibrad kasoo qaataan. Oo ay ku daydaan hogaamiyaha Malleshiya ee Mahaatiir maxamed, wuxuu samayn jiray marka uu dal booqdo gaar ahaan dunida horumartay sida jabaan oo kale ayuu fiiriyaa horumarkooda iyo waxa ay qabsadeen markaasuu buug iyo qalin la soo baxaa oo uu su'aalo waydiiyaa sida ay ugu suuroowday inay horumarkan gaadhaan, markuu dalkiisa ku soo noqdana wuxuu sameeyaa wixii uu soo arkay wax lamida.

Gunaanadkii iyo gabagabaddii hadii aanad Amaano iyo xirfad lahayn ogow inaad adigu xoriyadaada ku martay dariiqa faqriga.

## 37. INAAD QANI NOQOTO KUMAAD TALA GALIN.

Dadka faqiirka ahi waa dad talagalkoodu yahay kaliya inay difaac galaan oo aan marnba ku tala galin inay weerar galaan.

Kasoo qaad haddii laba kooxood ay kubbad ciyaarayaan oo kooxi ay niyooto inaanay goolba dhalin ee ay difaaca uun adkaystaan, bal ka waran natiijadu maxay noqonaysaa? Waxay noqonaysaa in kooxdaasi aanay wax gool ah dhalin, maxaa yeelay talagalkoodu ma ahaynba inay gool dhaliyaan.

Sidaa aan soo sheegnay oo kale ayaa ku dhaboobaysa dadka faqiirka ah, maxaa yeelay iyagu kaliya waxay ku talagalayaan oo ay ku dagaalamayaan inay quutal daruuriga helaan, oo daruuriyaadka nolosha dabbaraan. Oo marnba qorshaha uguma jirto inay lacag badan sameeyaan oo ay qani noqdaan.

Nabiguna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuxuu inoo sheegay in qof kastaaba uu helayo wixii uu niyoodo.

"... إنَّما الأعمالُ بالنِّيَّات، وإنَّما لِكُلِّ امرِئٍ مَا نَوَى"

waxaa taa ka duwan dadka qaniga ah oo iyaga ay ka go'an tahay inay hanti badan helaan, waxay sameeyaan wax kasta oo u suuragalinaya inay lacag helaan.

Haddii markaa aanad kuba talogalinba inaad qani noqoto, miyaanad adigu dooran dariiqii faqriga?

## 38. SI FIICAN UMA MAAMMUSHID LACAGTAADA.

Aqoonyahanka la yidhaahdo Tomas Stanley buuggiisa oo kamida buugta loogu iibsi badan yahay oo magaciisa la yidhaahdo ( Millionere next door)
Wuxuu ku soo ururriyay milliyaneerada waqooyiga maraykanka isaga oo cilmi baadhis ku sameeyay sida ay millioneeradaasi hantida ay haystaan ku heleen. Wuxuu yidhi waxaa natiijada cilmi baadhistaa lagu soo koobi karaa laba kalmadood oo kaliya: Dadka Qaniga ahi waxay aad ugu fiican yihiin maamulka lacagta , dadka faqiirka ahina lacagtooda ayay si xun u maamulaan ( way farsamo xun yihiin)

Dadka faqiirka ahi waxay ku doodaaan: maxaan maammulaa ma anigaa lacag igu filanba haysta?. Qaarkoodna waxay yidhaahdaan: maammulka lacagtu xorriyadda ayuu iga qaadayaa, waxaa kale oo ay yidhaahdaan, marka aan lacag baddan helo ayaan maammuli doonaa, laakiin xaqiiqadu waxay tahay ninka inta yar maammuli kari waayay ma in baddan ayuu maamuli karaa. Haddii aan doonayno inaan lacag hello waxaa muhiima inaan baranno sida lacagta loo maammulo oo aan ka baranno dadka lacagta leh sida ay lacagtooda u maamulaan.
Haddii aan tusaale usoo qaadano sida ugu fiican ee lacagta aan u maamuli karno waa sidan.
Kasoo qaad inaad tahay shaqaale oo aad mishahar qaadatid
U maamul lacagtaada sida hoos ku qoran
1- 10% kayd

2- 10% wax barasho
3- 70% baahiyahaaga daruuriga ah.
4- 10% sadaqo

Jadwalkani wuxuu khuseeyaa qof kasta heer kasta oo uu dhaqaalihiisu yahay, mishaharka uu qaataa intuu doono ha le, ekaadee.

Tusaale ahaan ka soo qaad in dakhligaagu yahay bishiiba 1000usd

10% kayd 100usd

10% waxbarasho 100usd

70% masaariifta daruuriga 700usd

10% sadaqo 100usd

Haddii uu dakhliggaagu ka kordho intaana waxaad ku dabaqdaa uun qaacidadii hore

Haddii aad sidaa ku dhaqanto waxa aad muddo kadib helaysaa lacag fiican oo kayd ah oo aad ganacasi ku samayn karto, waxbarashadaaduna horumar wayn baad ka samayn kartaa, masaakiintana maad qadinine waxaad ugu talagashay lacag go,an oo bil walba ah, taasna ilaahay ayaa kuugu barakaynaya xooggaaga iyo xoolahaaga labadaba

Laakiin dadka faqiirka ahi, iyagu wixii soo galaba dabka ayay saaraan oo marnaba wax qorshe ah ama maamul shaqo ma leh. Taasi ayaa keentay markaa inay faqri noqdaan.

Sida u sheegay Caalimka wayn ee horumarka bulshada magaciisana la yidhaahdo Brian Tracy wuxuu ku sheegay kitaabkiisa la yidhaahdo **Getting rich your own way:** waxaan hadalka kuugu soo koobayaa Qaacido muhiima oo aad ku xaqiijin karto Qaninimo ( **bixi wax ka yar waxa ku soo gala**).

Lacagta aad kaydinaysana u furo xisaab gooni ah oo aad ku kaydiso, marka aad mudo sidaa ku waddidna waxaad helaysaa hanti fiican oo aad wax ku qaban kartid.

Haddiise aad tahay mid wixii soo galaba dabka saara ogow inaadan waligaa faqri ka baxayn, sidaana ku dooratay dariiqa faqriga.

## 39. WAXAAD AAMINSANTAHAY INAAD XOOG U SHAQAYSO SIDAANA XOOLO KU HESHO.

Moron kama taagna in aad xoog u shaqaysaa waliba bilawga hore inta aad helayso hanti kugu filan oo aad ganacsi ku gali karto, laakiin waxaa khalad ah inaad waligaaba xoog u shaqayso, waayo shaqo aad kaligaa qabato horumar laguma gaadho, qaninimana laguma gaadho.

Aan kuu sheegee dadka qaniga ahi, waa dadka marka hore xoog u shaqeeya, hadaf cad leh, lacagtooda si fiican u maamula, marka ay urur
sadaan hanti ku filana samaysta mashruuc u gaara, markaa bilaaba in halkii uu xoog u shaqayn lahaa hantidiisu shaqayso.

Akhriste haddii aad tahay mid ku tala galay inaad waliggaaba xoogsi uun ku jirto ogow inaadan faqri ka baxayn.

Haddii aan tusaale ku siiyo bal xooga iyo maskaxdu sida ay u kala ahmiyad badan yihiin ufiirso

Ninka kuuliga ahi wuxuu shaqada u baxaa lixda subaxnimo ilaa lixda galabnimo wuxuuna la soo hay,daa ma kafayso masaariifta, halka ninka kale ee ama aqoontiisa ama xoolihiisu u shaqeeyaana wuxuu shaqeeyaa maalintii sideed saacadood ama ka yar wuxuuna hellaa hanti aad uga badan ta uu ninkaa kuuliga ahi qaato, markaa ama cilmi ku shaqee ama xoolahaagu ha shaqeeyaan, laakiin haddii aad waligaa muruq baan maali tidhaahdo waxaa iman doonta maalin uu xoogu dhamaanayo oo aad gaboobi doonto addiga oo aan waxba meel dhigan

Haddii aad sidaa aan soo sheegnay tahay miyaanad dariiqa faqriga dooran.

## 40. ISBADALKA WAAD NECEB TAHAY.

Samaynta isbadlku waa mid kamida dariiqa guusha.

Waxaa kale oo isbadalka lagu tilmaami karaa inuu yahay Sunne ilaahay nolosha inoogu jideeyay, haddii isbadalkaa la waayana khayr badan baa la waayayaa.

Isbadalka aan ka hadlaynaa waa ka la iska baddalayo xaalad xun oo liidata oo lagu baddalo mid kale oo fiican.

Isbadalka ilaahay baa quraankiisa ku tilmaamay oo sheegay .

إِنَّ اللَّهَ لَا يُغَيِّرُ مَا بِقَوْمٍ حَتَّىٰ يُغَيِّرُوا مَا بِأَنْفُسِهِمْ[الرعد: ١١]"

ILAAHAY qoomna ma baddalo ilaa ay iyagu is baddalaan.

Isbadalku waa mid inaga la inaga sugayo inuu xoriyadeena ku yimaado ee maaha mid cid kale ay inagu khasbi karto.

Isbadalkuna inta badan wuxuu yimaadaa marka qofku ku sugan yahay xaalad aanu raali ka ahayn, xaalad akhlaaqeed oo aanad raali ka ahayn, xaalad dhaqaale oo aanad raali ka ahayn, xaalad siyaasadeed oo aanad raali ka ahayn, marka dareenkaasi jiro waxaa meesha ka muuqda inaad is baddal u baahan tahay,

Isbaddalka dadku way ka baqaan intooda badan, taasina waxay sabataa inuu ku sugnaado xaaladdiisii hore, sidaana uu ugu noolaato xaalad dhaqaale oo aad u liidata. Tusaale ahaan haddii aad hayso shaqo, laakiin mishaharku aad kuugu yar yahay oo aanu kugu fillayn , xaaladdaasi miyaanay isbadal u baahnayn? . inaad wax kale raadiso ama aad aqoontaada kordhiso, ama ganacsi bilawdo, ama wax kale oo kuu dhaami kara aad samayso miyaan loo baahnayn?

Halkan waxaan ku soo qaadanaynaa Qiso ku saabsan isbadalka iyo ahmiyadiisa bal ila akhri

Qisada Gorgorka.

Gorgorku wuxuu noolaadaa toddobaatan sano, marka ay da,diisu gaadho afartan sano ayaa waxaa ku dhaca in afkiisa dheer ee uu wax ku qabsan jiray uu soo laabmo, cidiyihiisuna ay gaboobaan oo uu waxba ku qabsan kari waayo.

Waxaa kale oo ku dhacda in baalashiisu ay gaboobaan oo ay cuslaadaan laabtana kaga dhigaan duulistiina ay dhib ku noqoto.

Arrintani Gorgorka laba daran dhexdood bay doorran siisaa.

Waa marka hore inuu is dhiibo oo iska dhinto

Iyo inuu isbadal sameeyo, kaas oo xanuun badan oo qaadanaya mudo dhan 150 maalmood.

Gorgorku wuxuu doortaa inuu isbadal sameeyo una adkaysto xanuunkiisa, wuxuu u baxaa buur dusheed, kadibna wuxuu bilaabaa inuu afkiisa qaloocsmay dhagaxa ku garaaco si uu jabiyo. Marka uu afkiisa jabiyo wuu sugaa ilaa inta af kale usoo baxayo, kadib ayuu haddana bilaabaa inuu cidiyihiisa dhagaxa ku garaaco ilaa ay ka jajabaan dhamaantood. Hadana wuxuu sugaa inta ay ciddiyihii u soo baxayaan

Kadib buu haddana bilaabaa inuu rifo baalashiisii gaboobay, haddana uu sugaa ilaa inta ay baalal cusub uga soo baxayaan.

Kadib wuxuu duulaa isaga oo aad moodo inuu dib u dhashay, wuxuuna sii noolaadaa sodon sano oo kale.

## Qisadan maxaan ka qaadanaynaa arima dhawr ah

1. In isbadalku uu ka yimaado marka ay ku soo waajahdo xaalad aanad raali ka ahayn oo u baahan inaad wax ka qabato sida Gorgorka soo waajahday oo kale.
2. In isbadalku wuxuu leeyahay xanuun adag.
3. In haddii xanuunka isbadalka aad u adkaysato aad nolol fiican ku noolaan doonto isbadalka kadib.
4. In haddii aad isbaddal samayn waydo, dhibta ka dhalata isbadal la,aantu ay ka daran tahay dhibta isbadalka oo tusaale ahaan haddii Gorgorku dooran lahaa isbadal la,aan, taasi waxay

dhaxalsiin lahayd dhimasho, dhimashaduna way ka xun tahay xanuunkii ka soo gaadhay isbaddalka.

Qisadan waxaan ka qaadanaynaa oo inaga khuseeyaa waxay tahay haddii qofka dhaqaalihiisu liitaa isbaddal samayn waayo oo isbaddalka uu ka baqo waxaan shaki ku jirin inuu isagu xoriyadiisa ku doorty dariiqa faqriga.

## 41.WAAD AKHLAAQ XUN TAHAY

Akhlaaqdu waa qodob aad ugu muhiima qof kasta oo aadamaha kamida oo dunida ku nool, shaqada uu hayaa nooca ay doonto ha ahaatee.

Qiimaha iyo fadliga ay akhlaaqdu leedahay diinteena ayaa aad uga warantay, ILAAHAYNA nabi muxumed naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuu ku ammaanay akhlaaq wannaag.

وَإِنَّكَ لَعَلَى خُلُقٍ عَظِيمٍ

**(Waxaad ku sugan tahay akhlaaq aad u sarraysa)**

**Nin gabayaa oo caraba ayaa wuxuu yidhi:**

و إنما الأمم الأخلاق ما بقيت فإن هم ذهبت أخلاقهم ذهبوا

(*Ummadu waa Akhlaaq inta ay jirto, haddiise akhlaaqdu ka xumaato ummadaasi way baab,aday*).

Marka aan ka hadlayno Qaninimo iyo Faqiirtinimo, akhlaadu dawr aad u muhiima ayay ka qaadataa. Hadii akhlaaqdaadu xun tahay waxaan shaki ku jirin inaaddan horumar dhaqaale marnaba

samayn Karin, waayo dhaqaalaha samayntiisu waxay kaaga xidhan tahay inaad dadka xidhiid fiican la samayso, oo dadku ku jeclaadaan.

Mid kamida Jaamacadaha ugu waawayn dalka maraykanka ayaa waxay samaysay cilmi baadhis ku saabsan akhlaaqda iyo xirfada iyo dawrka ay ku leeyihiin horumarka

Waxay cilmi baadhistu ogaatay in horumarka qofka akhlaaqdu ka tahay 93% halka xirfadu ka tahay 7% kaliya.

Waa wax lala yaaba ah; bal ka waran qofku wuxuu aqoon barannayay laga bilaabo iskuulka hoose ilaa laga gaadho PHd ayaa waxay horumarkiisa ka tahay 7%, halka akhlaaqdu ka tahay 93%.

Kaalay oo bal ila eeg nin haysta darajada ugu saraysa cilmiga, laakiiinse beenaale ah, balwadle, bilaa amaano ah, bilaa samir ah, bilaa ixtiraam ah, bilaa balan ah, bal ka waran muxuu cilmigiisu u tarayaa.

Akhlaaqda looga baahan yahay qofka ee aan ka hadlaynaa waxaa soo galaya inaad tahay mid run sheegga, mid ballanta oofiya, mid samir leh, mid aan cadhoon haddii uu cadhoodana cadhadiisa qarsan kara, mid dhoolacaddayn badan, mid naxariis badan, mid hadal wanaagsan, mid saamaxaad badan, mid dadka xidhiidhiya iwm.

## 42. SHAQADA MA JOOGTAYSID

Joogtaynta shaqadu waa shardi muhiima waana tiirarka ugu waawayn ee horumarka, dadka horumarka sameeyay ama cilmi haku sameeyaan ama dhaqaale eh, dad kale kama maskax

badna, kama aqoon badna, kama fariidsana, arimaha ugu muhiimsan ee ay dadka kaga duwan yihiin waa iyaga oo shaqadooda joogteeya.

Macno badan ma samaynayso inta ay maalin xamaasadi ku qaado inaad shaqo badan qabato oo haddana aad joojiso, waxaase macno wayn samaynaya inaad shaqada joogtayso ilaa aad ka gaadhayso meeshii aad hiigsanaysay, haba yaraato shaqada aad qabannaysaaye, marka ay ururto waxay noqonaysaa wax wayn oo ku gaadhsiiya hadafkaaga.

Joogtaynta waxaa tusaale cad inoogu ah, diin iyo Bakayle ayaa borotamay dacawana waxay ka ahayd xaakim, kadibna orodkii baa bilaambay BAKAYLIHII jacdii horeba wuu ka dheereeyay Diinkii, markii uu bakaylihii arkay diinkii oo uu meel fog kaga tagay ayuu is yidhi: kollay diinka waad ka dheeraynnaysaaye iska yara seexo, wuu seexday, laakiin diinkii socodkiisii buu iska sii watay, bakaylihii hurdadii baa la tagtaye goor danbe ayuu soo baraarugay, mise diinkii wuu gaadhay bartii loo calaammaddeeyay, sidaana Diinkii ayay guushii ku raacday.

Qisadan waxaan ka qaadanaynaa in awood badan amase maskax badan oo aad dadka dheertahay aanay macno badan sammaynnayn haddii aanad ahayn mid shaqadiisa joogteeya.

Nabiguna naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee wuu tilmaamay arrintani ahmiyada ay leedahay oo wuxuu yidhi:

أحب الأعمال إلى الله أدومها وإن قل

*(ILAAHAY wuxuu ugu jecel yahay camalka la joogteeyo haba yaraadee).*

Haddaba haddii aad tahay mid aan shaqadiisa joogtayn oo intuu wax bilaabo ka taga, miyaanad adigu dooran dariiqa faqriga?

## 43. MA TAQAANID SIDA AY ARIMUHU U KALA MUDAN YIHIIN.

Had iyo jeer waxaa dhacda inay ina la soo gudboonaaddaan dhawr arrimood oo mid kastaba doonayso in wax laga qabto, amase inay soo baxdo dhawr fursadood, haddaba haddii aan horreysiino arrin mudan in la dib loo dhigo amase dib u dhigno mid in la horeysiiyo mudan, taasi waxay keenaysaa guuldarro.
Shareecada islaamku qodobkan ahmiyad wayn bay siisay waxaana laga qoray kutub.
Wuxuu yidhi Dictoor Yuusuf Alqardaawi isaga oo ka hadlaya fahanka arrimuhu sida ay u kala mudan yihiin wuxuu yidhi:

وأما (فقه الأولويات ) فنعني به وضع كل شيء في مرتبته ، فلا يؤخر ما حقه التقديم، أو يقدم ما حقه التأخير، ولا يصغَّر الأمر الكبير، ولا يكبَّر الأمر الصغير. هذا ما تقتضي به قوانين الكون، وما تأمر هب أحكام الشرع. أعني أن خلق الله تعالى وأمره (ألا له الخلق والأمر) كليهما يوجبان رعاية هذا الترتيب.

(Fahanka fiqiga mudnaanta waxaa looga jeedaaa in shay kasta la dhigo martabaddiisa oo aan dib loo dhigin wax in la horreysiiyo mudan, amase aan la soo horreysiin wax in dib loo dhigo mudan, Inaan Arin wayn la yarayn, arin yarna aan la waynayn, waa sida

uu Qaanuunka arladu keensanayo, waana sida Ilaahay amray inaan ku dhaqano).

Nabi Maxamedna Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ahaatee waqtigii dacwada ee hore oo ahayd waqtigii Makka wuxuu awoodda saaray Caqiiqada iyo Tawxiidka, waxaana dib loo dhigay salaada, soonka, xajka, jihaadka, iwm.

Taasi waa dariiqa diintu inoo jidaysay,

Waxaa arintaa soo hoos galaya arimaha shaqada, iyo kala doorashada arimaha adduunyada.

Iyagana waxaa loo eegaya sida ay u kala muhiimsan yihiin ee ay u kala manfac badan yihiin, waxaana dib loo dhigayaa wixii markaa ahmiyadiisu yartahay

Haddaba haddii aan fiqiga noocan ah nolosheena ku dabaqi wayno, wax horumar ah kama gaadhi karno shaqooyinkeena aduunyada, ha noqoto mid dhaqaale amase mid siyaasadeedba.

Haddii markaa aan kala saari kari wayno sida arimuhu ukala muhiimsan yihiin, miyayna taasi nolosheena ku keenayn dhibaatooyin badan oo aanay horumarkeena dib u dhigayn? haddiiba aa tahay mid aan kala sooci Karin arrimihiisa oo ay waraaqihiisu iskaga laaqan yihiin miyaanay taasi keenayn inaad doorotay dariiqa faqriga.

## 44. WAXAAD WAQTI BADAN KU LUMISAA KA HADALKA DADKA KALE CEEBAHOODA ( WAAD XAN BADAN TAHAY)

Marka aan ka sheekaynayno dadka kale, waxaan ku luminaynaa tamar iyo waqti labadaba, inaga oo aan wax wax soo saar ah samaynayn.

Bal u fiirso bilaahi calayka kuwa fadhiya meelaha fadhi ku dirirka, maxay qabtaan, miyaanay kaliya iskugu iman si ay dad kale uga sheekeeyaan; Jaraaidku maanta muxuu qoray, Bbcdu maxay tidhi, Tvgu muxuu sheegay, markaasaa wixii jaraaidku yidhi iyo wixii Biibiicidu tidhi la soo bandhigaa oo la falanqeeyaa oo nimba dhan ula kacaa, halkaana waqti badan oo noloshooda ah ay ku lumiyaan.

Walaalkayga Qaaliga ahoow, arrin baan kuu sheegayaa: dadkan aad ka sheekaynaysaayi waa dad hadaf leh, oo xaqiijiyay hadafkoodii, meeshii ay doonayeena gaadhay, sheekadaaduna waxna u kordhin mayso waxna u dhimi maysee, adigu doorkaagii mee, maxaad qabsatay, maxaase kuu qorshaysan.

Miyaan la gaadhin waqtigii aad isdaba qaban lahayd, waqtigii aad dantaada garan lahayd, waqtigii cimrigaaga inta ka dhiman aad maalgashan lahayd ee aad wax naftaada, dadkaaga iyo dalkaagaba anfaca aad qaban lahayd.

Arrintani waa arin ay ku dhaqmaan dadka liita ee iyagu naftooda dayacay, waqtigooda lumiyay, si xun wax u sheeg noqday, aan noloshooda wax hadaf ah ka lahayn, way cunaan, way seexdaan, way soo toosaan, way sheekeeyaan, haddana maalinta labaad

halkii shalay ayay ka soo bilaabaan oo goobaddaa madhan bay ku wareegaan.

Akhristaha sharafta lahoow ma igu waafaqsan tahay in arrintani kamid tahay arimaha keenaya faqriga?

Dadka noocan ah ee sidan u dhaqmayaa ma yihiin qaar bulshada wax ku soo kordhinaya, ma yihiin qaar dhaqaalaha wadanka kor u qaadistiisa ka qayb qaadanayaa, bal iska daa taaye, waxay bulshada ku yihiin dulsaar, bulshada ayay ku dul nool yihiin, qof kale oo walaalkii ah, ama saaxiibkii ah ayaa laga yaabaa inuu maalin walba wixii uu ku dhididay ka qaado.

Waxaa laga yaabaa dadka noocan ah in haweenkoodii ay yihiin kuwa salaada subax ku soo kallaha suuqa ee yaanyada ku iibiya, si ay caruurta aabahood dayacay quutal daruuriga ugu raadiso, miyaannay markaa nasiib darro ahayn?

ILAAHAY kaama dhigee, kuwa noocaas ah ha ku biirin, ha ka mid noqon, ha la saaxiibin, ha la sheekaysan, maxaa yeelay waxaan ka baqayaa inay fayraska ku qabadsiiyaan.

Dadka horumarka sameeyaa waxay ka sheekaystaan Fikiro waawayn, waxay ka sheekaystaan mashaariic cusub sidii ay u samayn lahaayeen, waxay ka sheekaystaan sidii mushkiladaha hor yaala ay xal ugu heli lahaayeen, waxay ka sheekaystaan siday dhaqaalahooda kor ugu qaadi lahaayeen, iwm.

Kuwan ku dayo, kuwan la saaxiib, kuwan ka ag dhawaw, waxaan shaki ku jirin inaad wax ka baran doonto' e

## 45. MARKA ALLE WAX KU SIIYO AYAAD IS CAJABISAA

Qofka marka uu dadaalo ee ILAAHAY dadaalkiisa ka aqbalo meel fiicanna gaadho ayuu is cajabiyaa oo uu moodaa inuu guushan ama xoolahani awoodiisa ku helay oo wuxuu u dhaqmaa si lamida sidii Qaaruun.

Xoolahani waxaan ku helay cilmi aan leeyahay, iyo awoodayda

Natiijadii maxay ku danbaysay inuu ilaahay isaga iyo daartiisiiba dhulka la gooyo.

Waxaa kale oo cibra inoogu filan sida uu quraanku inooga qisooday:

Labadii nin ee beerta lahaa, ee mid uu kii kale ku yidhi beertayda ayaa kaa fiican. Kii kalene yidhi: maxaa haddii aad beertaada gashay u odhan wayday Maasha,allah Ilaahay baa awood iyo quwada iska leh.

Kii kibrayna uu ku jawaabay: nimcada iyo barwaaqada beertayda ku taala umallayn maayo inay waligeed iga dhamaannayso, Qiyaamaha aad sheegaysana inuu dhacayo umallayn maayo.

Haddiiba ay dhacdose waxaan illaahay kala kulmayaa khayr iyo wanaag.

Natiijadii maxay ku danbaysay in beertii Ilaahay duufaan u soo diro oo uu burburiyo.

Qof kasta oo is cajabiya oo mooda inuu isagu waxa uu haysto ha noqdo xoolo, ha noqdo madaxtinimo, ha noqdo cilmiye, ku keenay awooddiisa sidaa ayaa u danbayn doonta.

Markaa iska jir haddii ilaahay nimco ku siiyay ha u qaadan inaad awooddaada ku keentay ee kii nimcada ku siiyay ku shugri,

haddiise aad sidaa yeeli waydo ogow inuu ilaahay nimcadda kaa qaadi doono oo aad sidaa ku dulloobi doonto, dee saw markaa faqiirtinimadaasi maaha mid aad xorriyadaada ku dooratay?

## 46.MACAASIDA ( DANBIYADA) AYAAD SAMAYSAA

Macsidu waxay keentaa inay barakada ka qaado risiqa, inay xoolaha baabi,iso in adiga oo barwaaqo ku jiray ay kaa saarto oo ay nolol adag ku galiso, waana sunne kowni ah oo ILAAHAY jideeyay

Nabi Adan Salaan Alle dushiisa ha ahaatee Janada waxaa ka soo saaray waa danbi uu galay.

Danbigaasi wuxuu sabab u noqday in nimcadii jannada ee aan gaajada lahayn, aan haraadka lahayn, ee qorax kulul lahayn, ee midhaha janada fadhiga lagu cunayay ay inaga soo saarto oo la ina keeno adduunyadan dhibta badan leh, ee rafaadka leh.

Umad kasta ama qof kasta haddii ay macaasi sameeyaan iyagana waa laga qaadayaa nimcadii ay ku jireen, haddii ay qani ahaayeen faqri baa loogu baddalaa, hadii ay amni haysteen cabsi baa loogu baddalaa, haddii ay is jeclaayeena khilaaf baa dhexdooda la dhigaa.

Qofkuna markaa isaga oo qani ah haddii uu macsiyo la yimaado wuxuu maray dariiqii faqriga ee sidaa ha u ogaado.

Bal hadda gaalada laftoodu marka ay macaasi sameeyaan iyagana way saamaysaa, wuxuu sheegay ninka la yidhaahdo Steven Kofin oo ah ninka leh kitaabka la yidhaahdo Todoba caado iyo ka kale ee la yidhaadho Siddeeda caado ayaa isaga oo ka waramaya

arinta ku saabsan macsiyadu sida ay shaqada u saamayso ee ay hoos ugu dhigto wax soo saarka ayaa wuxuu yidhi: waxaa la iigu yeedhay inaan talo ka bixiyo Bangi ay la soo darristay hoos u dhac dhaqaale oo wayn, wuxuu yidhi arrintii baan baadhay,muddo laba bilood ah baan ku jiray buu yidhi hawshaa, mushkiladdii waan fahmi waayay buu yidhi, meel aan u raaco iyo waxa keenaya hoos u dhacan joogtada ah, wax kastabaa waa ok. Ugu danbayn waxaa ii soo baxday oo aan helay buu yidhi xaqiiqadii mushkiladu halka ay ku lug lahayd, wuxuu yidhi:

Maamulaha shirkada isaga oo ah Nin xaas leh ayaa haddana wuxuu xidhiidh hoose la lahaa gabadh shaqaalaha kamida, taas oo ay dhamaan shaqaaluhuna ogaadeen.

Wuxuu yidhi: waxaan la fadhiistay maamulihii shirkada si toos ahna waan ugu sheegay inuu xidhiidh la leeyahay gabadh kamida shaqaalaha, oo waliba shaqaaluhuna ku ogaadeen, taasina waa ta keentay inay waxyeelayso kalsoonidii adiga iyo shaqaalaha idiin dhaxaysay.

Waxaan ku idhi: ma joojinaysaa xidhiidhka aad la leedahay gabadhaas?. Wuxuu yidhi dabcan waan joojinayaa maanta laga bilaabo.

Waxaan ku idhi buu yidhi: u qiro khaladkaas xaaskaaga iyo shaqaalahaba una sheeg inaad khaldantay oo aad arrintana halkaa aad ku joojinayso oo aanad dib danbe ugu noqon doonin kana dhabee.

Ninkii sidii buu yeelay, waqti yar kadib bangiggii sidiisii buu ku soo noqday oo kor ayay faaiidadiisii u kacday, maxaa yeelay

shaqaalaha macnawiyaatkoodii ayaa kor u kacay, kalsoonidii ay ku qabeen hogaamiyahooduna dib ayay u soo noolaatay,

Tani waa tusaale cad oo muujinaya sida macsiyadu ay shaqada u burburiso,

Ilaahayna quraankiisa wuxuu inooga digay macaasida oo dhan gaar ahaan macsida zinada .

Risiqana way baabi,isaa, oo ay .

**عن ثوبانَ مولَى رسولِ الله - صلَّى الله عليه وسلَّم - قال: قال رسولُ الله - صلَّى الله عليه وسلَّم - : ((لا يَزِيد في العُمُر إلا البِر، ولا يردُّ القدَرَ إلاَّ الدُّعاء، وإنَّ الرجل ليُحرم الرِّزقَ بالذنب يُصيبه)).**

Xadiiska inta danbe macnahiisu wuxuu yahay

(Qofka waxaa arsaaqda lagaga xarrimaa danbi uu gallay awgii).

Markaa haddii aad tahay mid had iyo jeer wixii Ilaahay kaa xarrimay ku jira, Ilaahayna risiqiisa ayuu kaa xarrimayaa ee sidaa u ogow

Taa lidkeeda Ilaahay arsaaqdiisa wuxuu siiyaa dadka Ilaahay ka baqa

Sida ilaahay quraankiisa ku sheegay

**وَمَن يَتَّقِ اللهَ يَجْعَل لَّهُ مَخْرَجًا وَيَرْزُقْهُ مِنْ حَيْثُ لَا يَحْتَسِبُ**

*( ninka ilaahay ka baqa ilaahay wuxuu u furaa jid uu dhibta kaga baxo, meel aannu fillayna wuu ka arsaaqaa).*

*Halkaa waxaa inooga soo baxay in danbigu uu risiq aan helli lahayn inaga hor istaagto halka Alle ka baquna uu arsaaqda baddiyo.*

*Markaa iska jir arintaa waxay keentaa faqriye aduun iyo mid aakhiro labadaba, e*

## 47. XOOLAHAAGA SADAQADA IYO SAKADA KAMA BIXISID

Sida qisada kuwii beerta lahaa ee uu ILAAHAY kaga waramay suurada Qalam, wuxuu inooga waramay inay jireen qolo beer aad u baxday lahaa, markii la gaadhay waqtigii beerta la goyn lahaa ayay ku heshiiyeen inay beerta goostaan qof miskiinnana aan waxba laga siin, si aanay masaakiintu u ogaanna in aroor hore la kallaho, xataa inshaallah may odhan, ILAAHAY markaa camalkoodii xumaa mid lamida ayuu ku abaalmariyay oo waxay u tageenba beertii oo la moodo inay gubatay oo kale.
Markaa haddii aad xoolo leedahay oo aad bixin waydo zakada iyo sadaqada adiga ayaa maray dariiqa faqriga.

## 48.SHARIIGAAGA AYAAD KHIYAAMAYSAA

Sida uu nabigu sheegay haddii laba qof ay shiraako noqdaan ILAAHAY baa ku saddex ah, haddii mid kood ka kale khiyaamana ILAAHAY wuu ka dhex baxaa, sidaana barakada ilaahay kaga qaadaa.
Markaa in badan oo sharikaadkeena kamida oo horumar dhaqaale samayn lahayd waxaa baabi,iya in midkood khiyaamadaas ku kaco, sidaana shaqadii ku burburto.
Haddii aad sidaa samaysay miyaanad adigu xoriyadaada dariiqa faqriga ku marin.

## 49.NIMCADA ILAAHAY KU SIIYAY KUMA SHUKRIDID.

ILAAHAY sida uu quraankiisa ku sheegay

وإذ تأذن ربكم لئن شكرتم لأزيدنكم ولئن كفرتم إن عذابي لشديد

***(haddii aad nimcada ku shugridaan ILAAHAY wuu iddiin siyaadin, haddii aad ku kufridaana cadaabka Alle wuu daran yahay).***

Haddii ILAAHAY xoolo ku siiyo, waxaa fiican inaad shukriga badiso, shugriga nimcadana waxaa kamida inaad sadaqada badiso, inaad dadka u naxariisato, inaad qaraabada xidhiidhiso, inaad zakada bixiso, iyo inaad qalbiga Ilaahay uga mahadceliso.

Sidaa marka aad samayso ILAAHAY wuu kuu kordhin, kuuna barakayn arsaaqda haddii kale oo aad nimcaddaa ku shugrin wayday oo aad ku gaallowdaydase ogow inaad adigu dooratay dariiqii faqriga.

## 50. WAAD IS DHIIBTAA

Sida aan ognahay marka aad doonayso inaan horumar ka samayso majaal kamida majaalada nolosha, waxaa lama huraana inay kula oo gudboonaanayso guuldarro, taasi waa lama huraan, walina taariikhda laguma hayo nin guul gaadhay oo bilaa turaanturo ku gaadhay, bilaa fashal ku gaadhay, bilaa khasaare ku gaadhay, kolley marar badan waad kufi, dadka guusha sameeyaa iyagu isma dhiibaan oo mar labaad iyo mar saddexaadba way isku

dayaan sidii ay usoo kici lahaayeen, waxaanad arrintan ka dheehan kartaa marka aad akhrido qisooyinka kuwii guulaystay , akhri taariikhda Thomas Addison oo fashilmay in ka baddan sagaalkun sagaal boqol iyo sagaal iyo sagaashan jeer, akhri taariikhda Honda oo haddii wax xunni jiro uu ku dhacay, akhri taariikhda Wallet dayzani, akhri taariikhda.

Arrimaha haddaba faqriga keena waxaa kamida in marka ay guuldarro kugu dhacdo aad is dhiibto oo dib danbe aad usoo kici waydo, adiga oo ka baqaya inay kugu dhacaan wax lamida wixii hore kuugu dhacay, haddii aad tahay mid is dhiiba marka dhibi ka hortimaado, ogow inaad adigu dariiqa faqriga sidaa ku doorotay.

## TIXRAAC ( REFERENCE)


1- The Top habits of millioners written by keith Cameron
2- 7 strategies for Wealth and Happiness written by jim Rohn
3- The 10 keys to success by John bird
4- Why have you chosen to be poor by Chief M. Nangoli
5- The 8 th Habit from effectiness to greatnes by Stephen Covey
6- Simple ideas for great life by Kareem shadily
7- You can win by Shiv khera
8- Secrets of the multimilionere by T harv Eker.